DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 26AAD | CADADKA 1AAD | TAARIIKH: 11/1/26 | Lam. 03 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Xabsiyada Dowladda Puntland

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Xabsiyada Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

**Sharci Lr. 003 ee 11-ka January 2026, kuna saabsan Ansixinta wax-ka-bedelka Sharciga Xabsiyada Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/49/2025, kuna taariikhaysan 13-ka Deseember 2025.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo Ansixinta Sharciga Xabsiyadda Dowladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Ansixinta Sharciga Xabsiyadda Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

**Tix:-XGGW/DPL/49/2025** **Garoowe, Sabti,Taariikh:- 13/12/2025**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Xabsiyada Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada 60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t) iyo 70-aad (1) ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada 2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2) iyo 58-aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/292/2024 ee November 12, 2024, kuna saabsan wax-ka-beddelka Xeerka Xabsiyada Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Xabsiyada Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga **57-aad**, Fadhigiisii **13-aad** ee **18.11.2025** cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka Xabsiyada Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa **(46)** Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**42**) Mudane, Diidmo ma jirin, halka ay ka aamuuseen (**4**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Xabsiyada Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA XABSIYADA DAWLADDA PUNTLAND

**Garoowe, November 2025**

# TUSMO


Cutubka 1-aad ........ 1
Qodobo Guud ........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Magaca Xeerka ........ 1
Qodobka 2-aad ........ 1
Eray Bixin ........ 1
Qodobka 3-aad ........ 3
Ujeeddada Xeerka ........ 3
Qodobka 4-aad ........ 3
Mabaadi'da Xeerka ........ 3
Qodobka 5-aad ........ 3
Baaxada Xeerka ........ 3
Qodobka 6-aad ........ 4
Fasiraadda Xeerka ........ 4
CUTUBKA 2-AAD ........ 4
DHISMAHA XABSIGA IYO HIRGELINTIISA ........ 4
QODOBKA 7-AAD ........ 4
SHAACIN GOOB XABSI ........ 4
Qodobka 8-aad ........ 4
Mas'uuliyadda Haynta iyo ........ 4
Dhaqancelinta Maxaabiista ........ 4
Qodobka 9-aad ........ 5
Xabsi Ku Meel Gaar ah ........ 5
Cutubka 3-aad ........ 5
Maamulka Xabsiyada ........ 5
Qodobka 10-aad ........ 5
Maamulidda iyo Gacan ku-haynta xabsiyada ........ 5
Qodobka 11-aad ........ 6
Amarrada Joogtada ah ee Taliyaha Ciidanka ........ 6
Qodobka 12-aad ........ 6
Magaacaabida Taliye Xabsi iyo ........ 6
Taliye ku xigeenka xabsiga ........ 6

Qodobka 13-aad ..... 7
Mas'uuliyadda Taliyaha Xabsiga ..... 7
Qodobka 14-aad ..... 8
Habraacyada Maamulka Xabsiga ..... 8
QODOBKA 15-AAD ..... 8
MAGACAABISTA SARAAKIIL ..... 8
DEMBI-BAARIS EE XABSIGA ..... 8
Qodobka 16-aad ..... 9
Awoodda iyo Waajibaadka Sarkaal Xabsi ..... 9
Qodobka 17-aad ..... 9
Magacaabista iyo Mas'uuliyadda Madaxa ..... 9
Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhawaynta ee Xabsiga ..... 9
QODOBKA 18-AAD ..... 12
MAGACAABISTA SHAQAALAHA ..... 12
RAYIDKA EE XABSIGA ..... 12
Qodobka 19-aad ..... 12
Ka-Qaadista Maxbuuska Sawir Kur ah ..... 12
iyo Raadka Faraha ..... 12
Qodobka 20-aad ..... 12
Keydinta Buugaagta iyo ..... 12
Dukumintiga Muhiimka ah ..... 12
Qodobka 21-aad ..... 12
Ciidammada Xoojinta Hawlaha Ciidanka Asluubta ..... 12
Qodobka 22-aad ..... 13
Doorka Wasaaradda Caddaaladda ..... 13
Qodobka 23-AAD ..... 13
DOORKA DIFAACA XUQUUQUL AADANAHA ..... 13
Qodobka 24-aad ..... 14
Kormeerka Xabsiyada ..... 14
Qodobka 25-aad ..... 14
Waajibaadka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud ..... 14
ee la Xiriira Xabsiyada ..... 14
QODOBKA 26-AAD ..... 15
KORMEERKA HAY'ADAHA ..... 15
DAWLADDA EE XABSIYADA ..... 15
Cutubka 4-aad ..... 15
SOO GUDBINTA IYO SII-DEYNTA MAXAABIISTA ..... 15

Qodobka 27-aad ... 15
Soo gelinta maxaabiista ... 15
Qodobka 28-aad ... 16
Baarista maxbuuska ... 16
Qodobka 29-aad ... 16
Haynta iyo Ilaalinta sharciga ah ... 16
ee Taliyaha Xabsiga ... 16
QODOBKA 30-AAD ... 17
WAX KA BEDDELKA XABSI KU HAYNTA ... 17
Qodobka 31-aad ... 17
Horgeyn maxkamadeed ... 17
Qodobka 32-aad ... 18
Sii-Deynta Maxbuuska ... 18
Qodobka 33-aad ... 19
Taakulaynta Maxbuuska ... 19
Xabsiga Laga Sii Daayey ... 19
Qodobka 34-aad ... 19
Dhimidda Mudada Maxbuuska ... 19
QODOBKA 35-aad ... 20
Sii-deyn Shuruudo Ku xiran ... 20
Qodobka 36-aad ... 20
Cafiska iyo Saamaxaadda Maxaabiista ... 20
CUTUBKA 5-aad ... 21
KALA-SOOCID MAXAABIIS ... 21
QODOBKA 37-AAD ... 21
KALA-SAARIDDA RAG IYO ... 21
DUMAR MAXAABIIS AH ... 21
QODOBKA 38-AAD ... 21
Kala Saaridda Maxaabiista ... 21
QODOBKA 39-AAD ... 22
Meel Gaara Ku hayn ... 22
QODOBKA 40-AAD ... 22
Isticmaalka Hubka ... 22
QODOBKA 41-AAD ... 24
Ku xad-gudubka Amaanka Xabsiga ... 24
QODOBKA 42-AAD ... 24
Dhimashada maxbuuska ... 24

QODOBKA 43-AAD ........ 25
Awoodda Baarista iyo ........ 25
Su'aalo-Weydiinta Dadka Xabsiga Gelaya ........ 25
Qodobka 44-AAD ........ 25
Dembiyada ka Dhasha Alaabta Reebban ........ 25
Qodobka 45-AAD ........ 26
Reebbanaanta Ag-joogista Xabsiga iyo Maxaabiista ........ 26
CUTUBKA 6-aad ........ 26
WAAJIBAADKA IYO SHAQADA MAXAABIISTA ........ 26
QODOBKA 46-AAD ........ 26
WAAJIBAADKA IYO ........ 26
MAS'UULIYADAHA MAXAABIISTA ........ 26
QODOBKA 47-aad ........ 27
SHAQO MAXAABIIS ........ 27
QODOBKA 48-aad ........ 27
Wax-soo-saarka Maxbuuska ........ 27
iyo abaalgudka shaqada ........ 27
QODOBKA 49-aad ........ 28
Barnaamijyada Dhaqan-Celinta ........ 28
CUTUB 7-AAD ........ 28
XUQUUQDA IYO DARYEELKA MAXAABIISTA ........ 28
QODOBKA 50-aad ........ 28
OGEYSIINTA MEESHA LAGU XIRAY ........ 28
QODOBKA 51-aad ........ 28
CUNTADA MAXAABIISTA ........ 28
QODOBKA 52-aad ........ 29
DHARKA MAXAABIISTA ........ 29
QODOBKA 53-aad ........ 29
GOGOSHA MAXAABIISTA ........ 29
QODOBKA 54-aad ........ 29
MABAADI'DA ASAASIGA AH EE LA DHAQANKA MAXAABIISTA ........ 29
QODOBKA 55-aad ........ 31
RUGTA CAAFIMAAD EE XABSIGA ........ 31
QODOBKA 56-aad ........ 31
SARKAAL CAAFIMAAD ........ 31
Qodobka 57-aad ........ 32
Dhakhtar iyo Kalkaaliyeyaal Caafimaad ........ 32



XEERILAALIYAHA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام

Qodobka 58-aad ........ 32
Nadaafadda Xabsiga ........ 32
Qodobka 59-aad ........ 32
U-Wareejinta Cusbitaalka Maxaabiista Bukta ........ 32
Qodobka 60-aad ........ 33
Wareejinta Maxbuuska Qaba Cudurada faafa ........ 33
Qodobka 61-aad ........ 34
Ogeysiinta Maxkamadda ........ 34
Wareejinta Maxbuus garsuge ah ........ 34
Qodobka 62-AAD ........ 34
XUQUUQDA HAWEENKA UURKA LEH ........ 34
Qodobka 63-aad ........ 35
Codsiyada iyo Cabashada Maxbuuska ........ 35
CUTUBKA 8-aad ........ 36
WAXBARASHO IYO XIRIIRO BULSHO ........ 36
EE MAXAABIISTA ........ 36
QODOBKA 64-aad ........ 36
WAXBARASHADA MAXAABIISTA ........ 36
QODOBKA 65-aad ........ 37
XIRIIRKA QOYS EE MAXAABIISTA ........ 37
QODOBKA 66-aad ........ 37
HELITAAN ADEEG SHARCI ........ 37
QODOBKA 67-aad ........ 37
Booqashada Maxaabiista ........ 37
Qodobka 68-aad ........ 38
Booqashada Booliiska ........ 38
Qodobka 69-aad ........ 38
Beddelka Maxaabiista ........ 38
QODOBKA 70-aad ........ 38
XIRIIR MAXBUUS SHISHEEYE ........ 38
Cutubka 9-AAD ........ 39
MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN ........ 39
Qodobka 71-aad ........ 39
Maxbuuska Dilka ku Xukuman ........ 39
Qodobka 72-aad ........ 39
Habraaca Booqashada Maxbuuska ........ 39
Dilka Ku Xukuman ........ 39

iyo Dhawridda Xuquuqdiisa ... 39
CUTUBKA 10-aad ... 40
ANSHAX-MARINTA IYO CIQAABTA ... 40
QODOBKA 73-AAD ... 40
HABRAACA ANSHAX-MARINTA Maxaabiista ... 40
Qodobka 74-aad ... 40
TALLAABOOYINKA ANSHAX-MARINTA ... 40
QODOBKA 75-aad ... 41
HABRAACA RAFCAANKA ANSHAXMARINTA ... 41
EE XABSIGA DHEXDIISA ... 41
QODOBKA 76-aad ... 41
ANSHAX-MARINTA UU SOO SAARO ... 41
TALIYAHA XABSIGA ... 41
QODOBKA 77-aad ... 41
XAD-GUDUBYO CULUS EE XABSI ... 41
QODOBKA 78-aad ... 42
CIQAAB XAD-GUDUBYO XABSI EE FUDUD ... 42
QODOBKA 79-aad ... 42
CIQAAB XAD-GUDUBYO XABSI EE CULUS ... 42
Qodobka 80-aad ... 42
Dabbaqaadda Dembiyada ku Xusan Xeerkan ... 42
Qodobka 81-aad ... 43
dammaanad-qaadka sharci ... 43
ee ciidanka asluubta ... 43
CUTUBKA 11-AAD ... 43
Qodobo qubane ah ... 43
Qodobka 82-aad ... 43
Maxaabiista Xabsiyada Shisheeye ... 43
Laga Soo Wareejiyo ... 43
Qodobka 83-aad ... 43
Raadinta Maxbuuska Baxsaday ... 43
Qodobka 84-aad ... 43
Hageyaasha, Hab-Raacyada iyo ... 43
Tilmaamaha Xilli-laha ah ... 43
QODOBKA 85aad ... 44
XEER-NIDAAMIYE ... 44
Qodobka 86-aad ... 44

**Burin** ........ 44
**QODOBKA 87-aad** ........ 44
**DHAQAN-GALKA XEERKA** ........ 44

## Cutubka 1-aad

## Qodobo Guud

### Qodobka 1-aad

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland.

### Qodobka 2-aad
### Eray Bixin

Haddii aan si kale xeerkan dhexdiisa loogu sheegin, erayadan waxaa loola jeedaa:-

| Lr. | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 2. | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 3. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee Dawladda Puntland. |
| 4. | **Xeer- ilaaliye** | Waxaa loola jeedaa Xeer- ilaaliyaha Guud ee Dawladda Puntland. |
| 5. | **Maxkamad** | Waxaa loola jeedaa maxkamad ka mid ah qaab-dhismeedka maxkamadaha Dawladda Puntland. |
| 6. | **Taliye** | Waxaa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Asluubta Dawladda Puntland. |
| 7. | **Taliye Xabsi** | Waxaa loola jeedaa sarkaal Mas'uul ka ah xabsi ka mid ah xabsiyada Dawladda Puntland. |
| 8. | **Xabsi** | Waxaa loola jeedaa Dhisme ama goob si xeerka waafaqsan loogu gaaryeelay in |

| | | |
|---|---|---|
| | | lagu hayo dadka xeerarku u aqoonsadeen xukumane ama garsuge. |
| 9. | **Kormeer** | Waxaa loola jeedaa kormeeridda iyo dabagalka xaaladaha xabsiyadda Puntland oo ay samaynayaan hay'adaha ku shaqada leh. |
| 10. | **Sarkaal Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa qof shaqo caafimaad ka haya xabsi. |
| 11. | **Maxbuus** | Waxaa loola jeedaa qof kasta, ha xukunaado ama yuusan xukunaan ee ku jira xabsi walba. |
| 12. | **Maxbuus Caruur ah** | Waxaa loola jeedaa maxbuus ka yar da'da 15 (shan iyo Toban Sano) sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 13. | **Maxbuus muddo dheer** | Waxaa loola jeedaa maxbuus ku xukuman xabsi muddo ka badan saddex (3) sano. |
| 14. | **Xeer-nidaamiyeyaal** | Waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu sameeyey si waafaqsan xeerkan. |
| 15. | **Amar Joogta ah** | Waa amarka uu soo saaro Taliyaha Ciidanka oo lagu dhaqayo xabsiyada. |
| 16. | **Habraac Maamul** | Nidaam Maamul ee taliye Xabsi uu u dejiyo xabsiga, isagoo aan ka hor imanayn waajibaadyada ku xusan Xeerkan Xabsiyada. |
| 17. | **Xabsi ku hayn** | Waxaa loola jeedaa warqad ka soo baxday maxkamad, oo lagu haynayo maxbuuska xabsiga. |
| 18. | **Maxbuus muddo gaaban** | Waxaa loola jeedaa maxbuus kasta oo ku xukuman xabsi muddo saddex 3 sano ah ama ka yar. |

| | | |
|---|---|---|
| **19.** | **Qoys** | Waxaa loola jeedaa qoyska Maxbuuska. |

## QODOBKA 3-AAD

## UJEEDDADA XEERKA

Ujeeddooyinka Xeerkani waa:-

1. In la helo xeer lagu nidaamiyo, laguna maamulo xabsiyada Dawladda Puntland.
2. In la dhawro xuquuqda maxaabiista, iyadoo la tixraacayo Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 28-aad, faqradiisa 1-aad.
3. In la tayeeyo xabsiyada Puntland si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda caalamiga ah.
4. In lagu toosiyo hab-dhaqanka maxaabiista, laguna xaqiijiyo in dhammaadka xarigooda ay ku noqdaan bulshada, iyagoo sii wadan kara nolol mas'uuliyadi ku dheehan tahay.
5. In la mariyo maxaabiista xukun ciqaabeedka xabsi ay ku ridey Maxkamad.

## QODOBKA 4-AAD

## MABAADI'DA XEERKA

1. Shareecada islaamka waa sharciga dalka ugu sarreeya, waxaana reebban wixii xeer ah oo ka soo horjeeda sida uu dhigayo Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 9-aad farqadiisa 4-aad.
2. Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha, sarreynta sharciga, caddaaladda iyo hannaanka ku dhisan isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta.
3. Toosinta iyo dib u dhaqan celinta maxaabiista.

## QODOBKA 5-AAD

## BAAXADA XEERKA

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan Xabsiyada Dawladda Puntland.

## QODOBKA 6-AAD

## FASIRAADDA XEERKA

1. Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Dawladda Puntland.
2. Wixii muran-xeereed ah ee ka dhasha xeerkan waxaa loo gudbinayaa maxkamadda Dastuurriga ah si ay u fasirto, sida ku cad qodobka 9-aad faqradiisa 3-aad ee xeerka maxkamadda Dastuuriga ah ee Dawladda Puntland.

# CUTUBKA 2-AAD

# DHISMAHA XABSIGA IYO HIRGELINTIISA

## QODOBKA 7-AAD

## SHAACIN GOOB XABSI

1. Taliyaha Ciidanka Asluubta ayaa soo jeedinaya dhisme ama goob kasta oo xabsi noqonaysa, iyadoo la waafajinayo nidaamka caalamiga ah ee xabsiyada, isagoo la tashanaya Wasiirka, waxaana dikreeto ku soo saaraya Madaxweynaha Dawladda Puntland.
2. Xarun kasta oo aan aqoonsi rasmi ah ka haysan Wasaarada Caddaaladda iyo Taliska Ciidanka Asluubta xabsi looma aqoonsan karo, cidna laguma xiri karo.

## QODOBKA 8-AAD

## MAS'UULIYADDA HAYNTA IYO DHAQANCELINTA MAXAABIISTA

Xabsiyada, haynta maxaabiista iyo dhaqancelintoodu waa mas'uuliyad u gaar ah xukuumadda, waxaana uga mas'uul ah Ciidanka Asluubta, cid kalena uma wareegi karto mas'uuliyadaasi.



XEERYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## QODOBKA 9-AAD

## XABSI KU MEEL GAAR AH

1. Xabsiga ku-meel-gaarka ahi, waa goob ama dhisme ay keento baahi jirta, taasoo uu asteeyo taliyaha xabsiga isagoo oggolaansho ka helaya Taliyaha Ciidanka Asluubta, si loogu xiro maxaabiis laga rarayo xabsiga.
2. In la wareejiyo maxaabiis waxay ku iman kartaa xaaladahan soo socda:-

   b) Marka ay tirada maxaabiista ee xabsiga ku xirani ka badato tiradii loogu tala galay, isla markaana aan lahayn xabsi kale oo loo raro tirada maxaabiista ah ee dheeraadka ku ah xabsiga.

   t) Marka ay xabsiga ka dilaacaan cudurrada faafa ama timaaddo baahi kale oo keentay in qaybo ka mid ah maxaabiista si ku-meel-gaar ah loogu hayo dhisme kale.

3. Taliyaha Ciidanku ka dib markuu helo soo jeedinta taliyaha xabsiga ee la xiriirta astaynta xabsi ku meel gaar ah wuxuu la tashanayaa Wasiirka, waxaana oggolaansho siinaya Madaxweynaha Dawladda Puntland.
4. Xabsi ku meel gaar ah waxaa lagu hayn karaa maxaabiista ilaa muddada xalka loo helayo duruuftii keentay markii hore.

## CUTUBKA 3-AAD

## MAAMULKA XABSIYADA

## QODOBKA 10-AAD

## MAAMULIDDA IYO GACAN KU-HAYNTA XABSIYADA

1. Taliyaha Ciidanka Asluubta ayaa leh maamulka iyo gacan ku haynta xabsiyada, wuxuuna mas'uul ka yahay xabsi-ku-haynta, daryeelidda xuquuqda qofka xukuman, wax-baridda maxaabiista, sugidda ammaanka xabsiyada iyo maxaabiista.
2. Taliyuhu wuxuu sida ugu dhakhsaha badan ula socodsiinayaa Wasiirka, Xeer ilaaliyaha Guud iyo Xafiiska Difaacaha Xuquuqul Insaanka Dawladda Puntland;-

   b. Baxsashada, isku day baxsasho Geerida iyo dhaawaca maxaabiista.

t. Wax kastoo halis ah sida cuduradda faafa, xaaladaha bini'aadanimo ee la xiriira maxaabiista kana hor-imanaya nidaamka iyo bedqabka maxaabiista.

3. Taliyuhu wuxuu kormeeraya xabsiyada Puntland muddada ku xusan Qodobka 24-aad farqadiisa 1-aad.
4. Talaabo kasta oo uu samayn karo ama uu amri karo Taliyaha Ciidanka Asluubta si waafaqsan xeerkan iyo Xeer-nidaamiyihiisa, waxaa kaloo samayn kara ama amri kara Taliye ku xigeenka Ciidanka haddii uu shaqada ka maqan yahay Taliyuhu ama uu oggolaansho ka haysto Taliyaha Ciidanka Asluubta.
5. Taliyaha Ciidanka waxaa u bannaan inuu la tashado Wasiirka iyo cid kasta oo door ku leh si uu u adeegsado kaalmada qof kasta ama urur kasta oo samo-fal ah.
6. Taliyaha Ciidanku wuxuu awood u leeyahay inuu kormeer iyo baaris ugu diri karo Madaxda iyo Hogaamadiisa kala duwan ee ciidanka xilli kasta oo loo baahdo.

## Qodobka 11-aad

## Amarrada Joogtada ah ee Taliyaha Ciidanka

1. Taliyaha Ciidanku mar kasta oo uu lagama maarmaan u arko, wuxuu bixinayaa amarro la xiriira maamulka, gacan-ku-haynta, ammaanka, dhaqan-celinta iyo arrimaha bulshada ee dhammaan xabsiyada Puntland.
2. Amarrada joogtada ah ee Taliyaha Ciidanku uu bixiyo si waafaqsan faqrada 1-aad ee qodobkan, waxaa dhammaystiraya xeer-nidaamiyaha uu Wasiirku soo saaro.

## Qodobka 12-aad

## Magaacaabida Taliye Xabsi iyo Taliye ku xigeenka xabsiga

1. Taliyuhu wuxuu magacaabayaa bedelayaa taliyayaasha xabsiyada, kuwaasoo mas'uul ka noqonaya nidaamka, maamulka iyo ammaanka xabsiyada.
2. Marka taliyaha xabsigu maqan yahay waxaa xilkiisa iyo shaqadiisii sii qabanaya ku xigeenkiisa.
3. Marka taliyaha xabsigu iyo ku xigeenkiisu maqan yihiin sifa walba ha ahaato

maqnaanshahooda, waxaa shaqada sii qabanaya cidda ugu mudan ee xeerka ciidanka asluubtu oggol yahay.

## QODOBKA 13-AAD

## MAS'UULIYADDA TALIYAHA XABSIGA

1. Taliyaha Xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta maxaabiista ku xiran Xabsiga uu markaa taliyaha ka yahay.
2. Si waafaqsan maamul wanaaga iyo amaanka xabsiga taliyuhu wuxuu amar ku soo saari karaa saraakiisha iyo maxaabiista.
3. Taliye Xabsi wuxuu kormeer iyo u kuurgal ku samaynayaa dhammaan waxyaabaha xiriirka la leh xabsiga ee uu u xilsaaran yahay iyo inuu mas'uul ka yahay anshaxa, la dhaqanka xubnaha iyo maxaabiista ku hoos jira maamulkiisa.
4. Taliyaha Xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay in maxaabiistu u hoggaansanto qodobada xeerkan ama xeer kasta ee kale iyo xeer-nidaamiyeyaal, tilmaamayaal ama amaro lagu sameeyey si waafaqsan xeerkan.
5. Taliyaha Xabsigu isagoo raacaya Xeerka Xabsiyada & Xeer-nidaamiyihiisa, tilmaamaha iyo amarrada madaxda sare wuxuu mas'uul ka yahay habsami-u maamulidda xabsiga taas oo lagu xaqiijinayo:-
   - b) Sugidda ammaanka xabsiga iyo maxaabiista.
   - t) Xabsi-ku-haynta maxaabiista muddada xariggooda la jideeyey.
   - j) Daryeelidda maxaabiista iyo ilaalinta nolosha iyo caafimaadka maxaabiista.
   - x) Xirfad/akhris/qoraal-barista maxaabiista iyo toosinta hab-dhaqankooda si ay ugu noqdaan bulshada, iyagoo sii wadan kara nolol mas'uuliyadi ku dheehan tahay.
   - kh) Dhawridda xuquuqda maxaabiista.
   - d) Habsami-u-diiwaan-gelinta maxaabiista si loola socdo tirada soo gasha bil iyo sannad kasta xabsiyada Puntland.
6. Taliyaha Xabsiga ayaa ka mas'uul ah baxsasho kasta oo uu ku kaco maxbuus ku jirey xabsiga uu taliyaha ka yahay, haddii aan mas'uuliyaddu si buuxda ugu wareegin Sarkaal Xabsi ama xubin ciidan, si waafaqsan Xeerkan ama

xeer-nidaamiyihiisa.

7. Taliyaha Xabsigu wuxuu u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka warbixin maalinle, bille iyo sanadle ah oo uu si faah-faahsan ugu xusay shaqaaqooyinka waaweyn, booqashooyinka muhiimka ah, dembiyada yar-yar iyo kuwa culus ee lagu galay xabsiga, tirada maxaabiista, xaaladdooda sharciyeed iyo wixii kale ee loo baahdo.

## QODOBKA 14-AAD
## HABRAACYADA MAAMULKA XABSIGA

1. Taliyaha xabsigu wuxuu soo saari karaa habraacyo maamul oo qoraal ah oo la xiriira maamulka iyo shaqada joogtada ah ee xabsiga, waxaana oggolaanaya Taliyaha Ciidanka.
2. Haddii ay iska horyimaadaan :-
   b. Amar joogto ah oo uu soo saaray Taliyaha Ciidanku iyo habraac maamul uu soo saaray Taliyaha Xabsigu waxaa la raacayaa amarka joogtada ah ee Taliyaha Ciidanka.
   t. Isla amarada iyo habraaca maamul oo uu soo saaray taliye xabsi waxaa la raacayaa xeerkan iyo xeer-nidaamiyihiisa.
3. Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa talaabo kasta oo lagama maarmaan ah, si uu habraacyada maamul ee uu soo saaray ugu wargeliyo saraakiisha xabsiga, xubnaha ciidanka, xubnaha dadka xabsiga soo booqanaya iyo maxaabiista xabsiga ku xiran.

## QODOBKA 15-AAD
## MAGACAABISTA SARAAKIIL DEMBI-BAARIS EE XABSIGA

Taliyaha Ciidanka Asluubtu wuxuu u xil saari karaa xabsiyada saraakiil baara Marka fal-dembiyeed uu ka dhaco Sarkaal xabsi, laakiin waa in fal dambiyeedku la xiriiraa xil-gudashada Sarkaal xabsi, markuu faldambiyeedku ku caddaado eedaysanaha, ayna saraakiishu u soo gudbiyaan Taliyaha Ciidanka wuxuu shaqada ka joojin karaa sarkaalka xabsi si waafaqsan Xeerka Ciidanka iyo Xeer-nidaamiyihiisa.

## Qodobka 16-aad

## Awoodda iyo Waajibaadka Sarkaal Xabsi

Sarkaal xabsi wuxuu:-

1. Mas'uul ka yahay inuu sugo ammaanka xabsiga iyo goobta looga xilsaaro inuu ka shaqeeyo.
2. Mas'uul ka yahay baxsashada maxbuus isaga la hoos-geeyey ama uu ilaalintiisa u xilsaarnaa markuu shaqada lahaa.
3. U hoggaansamayaa dhammaan amarrada sharciga ah ee uu siiyo Taliyaha Xabsigu ama sarkaal xabsi ee xukuma ama kormeer ku leh iyo weliba amarrada iyo tilmaamaha Taliyaha Ciidanka.
4. Siin karaa maxbuus amarrada lagama maarmaanka u ah xaqiijinta ujeeddooyinka Xeerkan sida, ammaanka, kala-dambaynta ama maamulidda xabsiga.
5. Adeegsan karaa xoogga macquulka ah ee lagama maarmaanka u ah inuu sugo amarradiisa ama amarrada kale ee sharciga ah ee ay tahay in loo hoggaansamo.

## Qodobka 17-aad

## Magacaabista iyo Mas'uuliyadda Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhawaynta ee Xabsiga

1. Taliyaha Ciidanku kadib markuu la tashado Taliyaha Xabsiga, tix-gelinayana aqoonta gaarka ah ee looga baahan yahay mas'uulkan, wuxuu magacaabayaa Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-dhaweynta Xabsiga.
2. Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta Xabsigu wuxuu yeelan karaa diiwaannadan soo socda:-
   b) Diiwaanka Garsugayaasha.
   t) Diiwaanka Racfaannada.
   j) Diiwaanka Xukumanayaasha xukunkoodu noqday kama dambays.
   x) Diiwaanka Booqashooyinka.
   kh) Diiwaanka Dacwadaha iyo Anshaxa.
   d) Diiwaanka Caafimaadka.

r) Diiwaanka lacagta, Alaabta yar-yar ee Qiimaha leh iyo Dharka Maxaabiista.

s) Diiwaanka Geerida.

sh) Diiwaanka xiridda iyo furidda.

dh) Diiwaanka Dhacdooyinka.

c) Diiwaannada kale ee lama huraanka noqda.

3. Taliyaha Xabsigu, kadib markuu la tashado Taliye-xigeenka iyo Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta xabsiga, wuxuu magacaabayaa saraakiil mas'uul ka noqda diiwaannada xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta xabsiga, tiradooduna ay tahay hadba inta loo baahdo.

4. Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta Xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay guud ahaan diiwaannada kala duwan ee Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta ee Xabsiga, waxaana mas'uuliyaddiisa ka caawinaya Diiwaan-hayeyaasha kala duwan.

5. Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-dhaweyntu wuxuu ku qorayaa ama hubinayaa in lagu qoro diiwaannada kala duwan dhammaan macluumaadka loogu tala galay diiwaan kasta ee la xiriira maxbuuska, waxaanu si aan dib-u-dhac lahayn u gudanayaa waajibaadka ka saaran u suurto-gelinta maxbuuska xuquuqda xeerarku u waajibiyeen sida:-

   b. Ku-wargelinta maxbuuska inuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen iyo la xiriirintiisa qareenka uu doonayo inuu u wakiisho dacwaddiisa, haddii aanu qareen qabsan karinna uu la xiriiriyo hay'adaha bixiya kaalmada sharciga.

   t. Ka ilaalinta maxbuuska in uu ku muddo dhaafo garsugenimada.

   j. U-qoridda maxbuuska la xukumay racfaanka uu codsado, iyadoo laga taxadarayo in ay ka dhacdo muddada loo oggol yahay inuu ku dalbado racfaan.

   x. Hubinta u-diiwaan-gelinta maxbuuska buka xaaladdiisa caafimaad, kulammada uu la yeeshay Sarkaalka Caafimaadka ama dhakhtarka iyo daaweynta la siiyey.

   Kh. U-diiwaan-gelinta maxbuuska fal-dembiyeedyada uu geysto muddada

uu xabsiga ku jiro iyo tallaabada laga qaaday.

d. Maamulidda iyo diiwaangelinta booqashooyinka loogu yimaaddo maxbuuska.

r. U ilaalinta maxbuuska xukuman taariikhda uu xabsiga ka baxayo.

s. Saarristii kasta ee kale ee diiwaan-gelinteeda lagu jideeyo xeerkan, amarrada joogtada ah ama amarrada gaarka ah.

6. Lacagta maxaabiista iyo alaabta yar-yar ee qiimaha leh waxaa lagu xafidayaa khasnadda xafiiska Taliyaha Xabsiga.

7. Marka maxbuusku codsado in lacagta loo hayo looga soo iibiyo shay aan maamnuuc ahayn, Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweyntu wuxuu Taliyaha Xabsiga u soo diyaarinayaa nidaam-xisaabeedka maxbuuska lagu siinayo, diiwaankana lagaga saarayo lacagta uu soo codsaday, iyadoo ka saarista diiwaanka ee lacagtaa laga saxiixayo maxbuuska lacagta leh.

8. Lacagta, alaabta yar-yar ee qiimaha leh, dharka iyo dhammaan alaabta kale ee ay leeyihiin maxaabiistu ee lagu aaminay, waana inuu tiriyo, iyadoo marag leh, laguna qoro diiwaanka loogu talagalay tirada lacagta, dharka ama alaabta kale, khaanadda la dhigay dharka ama alaabta iyo markhaatiyada tirada alaabta goob-joogga u ahaa iyo saxiixa maxbuuska leh lacagta, dharka ama alaabta kale.

9. Haddii alaab laga diiwaan-geliyey Xafiiska Tirada iyo Soo-Dhaweynta la waayo ama khasaare gaaro Taliyaha Xabsigu:-

b. Wuxuu hubinayaa khasaaraha dhacay iyo cidda gaar ahaan uga mas'uulka ah arrintaas.

t. Markuu Taliyaha Xabsigu xaqiijiyo sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee mas'uulka ka ah dhibaatada dhacday, wuxuu maxbuuska u mag-dhebayaa khasaaraha gaaray alaabtiisa, waxaanu si tartiib ah uga jarayaa mushaharka sarkaalkaa xabsi ama xubintaa ciidan qiimaha khasaaraha ku yimi alaabta ee loo mag-dhebey maxbuuska.

10. Waajibaadka iyo mas'uuliyadda Diiwaan-Hayaha Xafiiska Tirada iyo Soo Dhaweynta xabsiga waxaa lagu faah-faahinayaa xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

## QODOBKA 18-AAD

## MAGACAABISTA SHAQAALAHA RAYIDKA EE XABSIGA

1. Xeerkan wuxuu jideynayaa in saraakiil caafimaad, macallimiin iyo saraakiil kale ee aan ahayn saraakiisha xabsiga inay ka hawlgalaan xabsiyada.
2. Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka Xeerkan, Taliyaha Ciidanku wuxuu qori karaa, kana hawlgelin karaa xabsiyada shaqaale rayid ah, isagoo la tashanaya hay'adaha ay khusayso, iyadoo la raacayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

## QODOBKA 19-AAD

## KA-QAADISTA MAXBUUSKA SAWIR KUR AH IYO RAADKA FARAHA

Marka ay farsamo ahaan ugu suurto gelayso, Taliyaha Xabsigu wuxuu amrayaa in maxbuuska marka xabsiga la keeno laga qaado sawir kurka ah oo soo jeed iyo gudub ah iyo weliba raadka faraha.

## QODOBKA 20-AAD

## KEYDINTA BUUGAAGTA IYO DUKUMINTIGA MUHIIMKA AH

Taliyaha Xabsigu wuxuu xafidayaa buugaagta, dukumintiyada, qoraallada, joornaallada IWM ay ku qoran yihiin xeerarka, wareegtooyinka, amarrada, anshax-marinaha iyo aragtiyaha kormeerayaasha.

## QODOBKA 21-AAD

## CIIDAMMADA XOOJINTA HAWLAHA CIIDANKA ASLUUBTA

1. Xaaladaha uu Ciidanka Asluubtu ku filnaan waayo nabad gelyada iyo maamulka xabsiga ama hawl-gallada maxaabiis loogu wareejinayo xabsi kale, waxaa si ku-meel-gaar ah loogu xoojin karaa xubno ka tirsan ciidammada kale ee Puntland sida Booliiska iyo Ciidanka Daraawiishta.
2. Xubinta ka tirsan Ciidammada Booliiska ama Ciidanka daraawiishta ee lagu xoojiyey Ciidanka Asluubta, muddada ay la hawlgeleyso Ciidanka Asluubta

waxaa saaran xilka iyo waajibaadka xubinta dhiggeeda ah ee Ciidanka Asluubta, iyadoo yeelanaysa awoodda ay leedahay xubinta dhigeeda ah ee Ciidanka Asluubtu, waxaana lagu dhaqayaa xeerarka iyo amarrada khuseeya Ciidanka Asluubta.

## QODOBKA 22-AAD

## DOORKA WASAARADDA CADDAALADDA

Wasaaradda Caddaaladda ayaa mas'uul uga ah xukuumadda arrimaha la xiriira xabsiyada iyo maxaabiista, iyadoo ay ku leedahay awoodahan soo socda:-

1. Diyaarinta, hirgelinta Siyaasadaha, wax ka beddelka xeerarka xabsiyada iyo soo jeedinta qorsheyaasha istaraatiijiyadaha ee lagu horumarinayo, laguna tayaynayo xabsiyo la heer ah kuwa caalamka, waxaana lala tashanayaa Taliyha Ciidanka Asluubta.
2. Asaasidda, furidda, xiridda iyo hagaajinta xabsiyada marka lagala tashado Taliyaha Ciidanka Asluubta.
3. Soo saaridda xeer-nidaamiyaha Xeerkan, iyadoo lala tashanayo Taliyaha Ciidanka Asluubta.
4. Kormeeridda, dabagalka, qiimaynta xaaladaha xabsiyada, toosinta, tilmaamidda iyo ka gacan siinta Ciidanka Asluubta arrimaha la xiriira xaaladaha xabsiyada iyo maxaabiista.
5. U-hawl-galka, u qareemida iyo u-ololaynta dhaqaalaha lagu fulinayo haynta, daryeelka iyo dhaqan-celinta maxaabiista.

## QODOBKA 23-AAD

## DOORKA DIFAACA XUQUUQUL AADANAHA

1. Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha wuxuu leeyahay awood buuxda oo uu ku booqan karo xabsiyada iyo xarumaha lagu hayo maxaabiista wakhti kasta oo ku habboon.
2. Xafiisku wuxuu mas'uul ka yahay la socoshada xuquuqda maxaabiista sida;-
   t. In aan la jirdilin, lagu xadgudbin, lana ciqaabin.
   b. Inay helaan cunto, biyo, caafimaad, hurdo iyo daryeel ku filan.
   j. Inay helaan booqasho qoys iyo xiriir ay la yeeshaan qareennadooda.

3. Xafiiska Xuquuqul Insaanku wuxuu awood u leeyahay inuu qabto cabashooyinka maxaabiista ama ehelkooda ee la xiriira xad gudub loo gaystay maxbuuska.
4. Haddii xad gudubka la xaqiijiyo, xafiisku wuxuu soo jeedin karaa tallaabooyin sharci.
5. Xafiiska Xuquuqul Insaanku wuxuu la shaqayn karaa hay'adaha dawladda, ururrada xuquuqul insaanka ee gudaha iyo kuwa caalamiga ah si loo xoojiyo ilaalinta xuquuqda maxaabiista.

## QODOBKA 24-AAD

## KORMEERKA XABSIYADA

1. Taliyaha Ciidanka Asluubta wuxuu sameynayaa ugu yaraan saddexdii (3) bilood halmar, baaritaan iyo kormeer uu ku tagayo xabsiyada Puntland, isagoo kormeerka iyo baaritaanka warbixinteeda u gudbinaya Wasiirka Caddaaladda.
2. Taliyaha ciidanku wuxuu kormeerka iyo baarista u idman karaa si waafaqsan qodobadda xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha kale ee xabsigu lagu maamulo Taliye-xigeennada Ciidanka Asluubta.

## QODOBKA 25-AAD

## WAAJIBAADKA XAFIISKA XEER-ILAALINTA GUUD EE LA XIRIIRA XABSIYADA

1. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud, ku xigeenka xeer ilaaliyaha guud, xeer ilaaliyaasha gobollada iyo wakiillada xeer ilaaliyaasha gobollada waxay sameynayaan kormeerrada xabsiyada ee lagama maarmaanka loo arko, ayna ku hubinayaan daryeelka la siiyey maxaabiista iyo in loola dhaqmay si xeerarka iyo Dastuurka waafaqsan sida ku cad qodoboka 105-aad farqadiisa 2-aad xarafka "J" ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud markuu u arko inay ku habboon tahay, wuxuu baadhis ku samayn karaa xabsiyada iyo maxaabiista, waxaanu su'aalo weydiin karaa maxaabiista.

## QODOBKA 26-AAD
## KORMEERKA HAY'ADAHA
## DAWLADDA EE XABSIYADA

Kormeerka iyo daba-galka xabsiyada Puntland waxaa samaynaya hay'adaha awoodda u leh sida; Golaha Wakiillada, Xeer-ilaalinta Guud, Difaacaha Xuquuqul Insaanka iyo Wasaaradda Caddaalaadda, waxayna kormeerkooda samaynayaa sannadkiiba labo mar iyo markasta oo loo baahdo ama duruufi timaado, waxayna kormeerka u samayn karaan si wada jir ah ama kala gaar ah.

## CUTUBKA 4-AAD

## SOO GUDBINTA IYO SII-DEYNTA MAXAABIISTA

### QODOBKA 27-AAD
### SOO GELINTA MAXAABIISTA

1. Taliyaha Xabsiga ayaa mas'uul ka ah inuu qabto dadka la xukumay ee soo gaaray xabsiga, maxbuus kasta haddii uu garsuge yahay ama xukumane yahay waxaa lagu qaban karaa amar qoraal ah oo ka soo baxay maxkamad awood u leh.
2. Maxbuusku waa inuu helo xog ku saabsan xuquuqdiisa iyo waajibaadka saaran, nidaamka, duruufaha xabsiga iyo fulinta xukunka ay maxkamaddu ku riday. Ciidanka Asluubta waxaa waajib ku ah inay siiyaan maxaabiista macluumaad faah-faahsan, si ay u ogaadaan isbeddel kasta oo cusub oo ku yimaada habraacyada iyo xaaladaha xukunka.
3. Qofna looma gudbin karo xabsi haddii uusan la socon amar-bixin maxkamadeed.
4. Taliyaha Xabsiga wuxuu xaqiijinayaa in maxbuusku yahay qofka ku magacaaban amar-bixinta iyo in qoraalka xiritaanku ay leeyihiin saxiixa iyo shaabadda maxkamadda iyo inay u dhan yihiin dhammaan shuruudaha kale ee xeerarka.
5. Taliyaha xabsigu ma aqbali karo xariga ilmo ka yar da'da 15-sano sida ku cad Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 31-aad.

6. Xabsi ku hayntu waa in ay ku qornaato:-
   b. Magaca maxkamadda uu ka soo baxay xabsi ku hayntu.
   t. Taariikhda la qoray xabsi ku haynta.
   j. Magaca saddexan ee uu qofka xabsiga lagu haynayo iyo magaca buuxa ee Hooyadii.
   x. Da'da qofka ee xabsiga lagu haynayo.
   kh. Muddada xabsi ku hayntiisa.
   d. Magaca iyo saxiixa garsooraha ama garsoorayaasha soo saaray.
   r. Shaabadda maxkamadda garsooruhu ka tirsan yahay ee awoodda u leh soo saaridda xabsi ku haynta.
   s. Arrintii kale ee lagu jideeyo xeerkan ama xeer kale.

## QODOBKA 28-AAD

## BAARISTA MAXBUUSKA

1. Maxbuus kasta waa la baarayaa marka la keeno xabsiga iyo mar kasta oo uu Taliyaha xabsiga u arko in ay lama-huraan tahay ama marka uu amro Taliyuhu Ciidanka Asluubta, xubin la jinsi ah maxbuuska ayaa baaraya (lab ama dheddig), waxaana laga qaadayaa wax kasta mamnuuc ah oo laga helo.
2. Waxyaalaha halista ah oo laga helo maxbuuska sida hubka oo kale waxaa loo gudbinayaa booliiska ku shaqada leh.
3. Wax kasta oo aan waxyeelo lahayn oo laga helo maxbuuska waxaa la siinayaa marka la siideynayo.

## QODOBKA 29-AAD

## HAYNTA IYO ILAALINTA SHARCIGA AH EE TALIYAHA XABSIGA

1. Maxbuus kasta oo ku jira xabsiga wuxuu hoos imaanayaa haynta iyo ilaalinta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka.
2. Maxbuuska kasta marka laga qaadayo ama lagu sii wado xabsiga ama markasta oo uu ka shaqeynayo meel debedda ka ah xabsiga ama uu ku sugan yahay meel ka baxsan xuduuda xabsiga isagoo gudanaya hawl la oggolaaday, waxaa loo aqoonsanayaa in uu ku jiro haynta sharciga ah ee Taliyaha

Ciidanka.

3. Dhammaan maxaabiista marka beddel lagaga qaadayo xabsi oo mid kale loo qaadayo waxaa la raacinayaa ilaalo adag.
4. Waajibaadka ilaalada gaarka ah ee ku xusan farqaad (3) ee Qodobkan waxaa lagu caddeynayaa amarrada joogtada ah.

## QODOBKA 30-AAD

## WAX KA BEDDELKA XABSI KU HAYNTA

1. Markasta oo Maxkamad awood u lihi ay wax ka beddesho xabsi ku haynta maxbuus xabsi ku jira, waxaa taliyaha xabsiga loo soo gudbinayaa xabsi ku haynta dambe.
2. Haddii ay dhammaato muddada xabsi ku haynta ee maxbuuska, taliyaha xabsigu wuxuu horgeynayaa maxkamadii soo gudbisay xarigiisa.

## QODOBKA 31-AAD

## HORGEYN MAXKAMADEED

1. Taliyaha Xabsigu markuu helo amarka uu ku saxiixan yahay guddoomiyaha ama garsoore ka tirsan maxkamadda awoodda u leh dhegeysiga dacwadda maxbuuska magaciisu ku xusan yahay amarka ee lagu amrayo Taliyaha Xabsiga in maxbuuska la hor-keeno maxkamadda xilli lagu sheegay amarka, wuxuu maxbuuskaa hor-geynayaa maxkamadda xilligaa.
2. Haddii maxbuuska ku xusan faqradda (1) ee qodobkani uu xabsiga ugu jirey garsuge ahaan, waxaa maxkamad horgeyntiisa u xilsaaran Taliyaha Saldhigga Booliiska ama Waaxda Dembi-baarista ee dacwadda maxbuuska gacanta ku haysa, haddiise maxbuuska uu ku dhacay xukunkii maxkamadda darajada koowaad, waxaa darajooyinka maxkamadaha ee kale maxkamad-hor-geyntiisa u xilsaaran Taliyaha Xabsiga.
3. Maxbuuska amar sharci ah lagu horgeeyey maxkamad, marka laga reebo maxbuuska garsugaha ah, waxaa loo aqoonsanayaa inuu ku jiro haynta sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka muddada uu kaga maqan yahay xabsiga ujeeddada ku xusan amarka sharciga ah.
4. Maxbuus kasta oo garsuge ah oo muddadii xabsi ku hayntiisu ay ka

dhammaato, wuxuu Taliyaha Xabsigu u diyaarinayaa in maxkamad la hor-geeyo, wuxuuna xusuusinayaa Taliyihii Saldhigga ama Madaxa Waaxda Dembi-baarista ee dacwaddiisa gacanta ku hayey, xaaladda sharci ee maxbuuska.

5. Haddii uu Taliyaha Xabsigu u arko in aan maxbuuska cid maxkamadda geysaa u soo socon wuxuu ku wargelinayaa arrinta maxbuuska maxkamaddii soo xirtay intaanay dhammaan saacadaha shaqada ee maalinta maxbuuska la horgeyn lahaa maxkamadda.

6. Marka maxbuus xukuman xabsi ku hayntiisa lagu sheego ganaax ama bixin xuquuq madani ah, haddii ganaaxa oo aan la bixin la gaaro dhammaadka muddada xarigga, waxaa ganaaxa loogu beddelayaa xarig u dhigma, haddiise xariggu dhammaado, iyadoo aan la bixin xuquuqdii madaniga ahayd, Taliyaha Xabsigu wuxuu maxbuuska 14 cisho ka hor maalinta uu xabsiga ka baxayo, horgeynayaa Maxkamadda awoodda u leh, si ay u suurto geliso in maxbuusku ka baxo xabsiga maalinta ciqaabta lagu xukumay ka dhammaato, bixinta xuquuqda madaniga ahna loogu maro nidaamka sharcigu u jideeyey.

## QODOBKA 32-AAD

## SII-DEYNTA MAXBUUSKA

1. Taliyaha xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay siideynta maxbuuska isagoo fulinaya amarka maxkamada.
2. Maxbuuska xukuman wuxuu sii deyn xaq u yeelanayaa:-
   b) Marka ay dhammaato muddada xariggiisu si waafaqsan xeerkan.
   t) Marka uu ka faa'iidaysto cafis guud ama saamaxaad gaar ah si waafaqsan Xeerkan, xeer-nidaamiyaha, Xeerarka Ciqaabta iyo habka ciqaabta Soomaaliyeed.
   j) Marka lagu sii daayo sii-deynta shuruudaysan si xeerkan iyo xeer-nidaamiyihiisa waafaqsan.
   x) Marka Taliyaha Xabsiga ay soo gaarto amar sii deyn oo ka soo baxay maxkamad awood u leh.
3. Maxbuus ay daawo u socoto oo sarkaal caafimaad uu daaweynayo, marka la

doonayo in la siidaayo waxaa loo gudbinayaa cusbitaal ama goob kale oo caafimaad halkaas oo daaweyntiisu uga sii soconayso.

4. Maalinta la amro in la siidaayo maxbuuska waxaa la siideynayaa saacadaha shaqada haddii maalintaasi ay ku soo aado Jimce ama maalmo fasax ah, waxaa la siideynayaa maalinta xigta inta lagu gudajiro wakhtiga shaqada.

## QODOBKA 33-AAD

## TAAKULAYNTA MAXBUUSKA

## XABSIGA LAGA SII DAAYEY

1. Taliyaha xabsigu wuxuu caawimaad u fidin karaa maxbuuska aysan maskaxdiisu ama caafimaadka jirkiisu taam ahayn si uu u gaaro deegaankiisii.
2. Maxbuuska laga sii daayo xabsi ku yaalla degmo aan ahayn degaankiisa, haddii uu codsado, waxaa lagu gaarsiinayaa degmadiisa kharash dawladeed, iyadoo la siinayo nooli si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha Xeerkan.
3. Iyadoo looga dan-leeyahay in laga hortago ku noqnoqoshada fal dembiyeedyada, maxbuuska xarig dheeraha ah ee laga sii daayo xabsiga ee caafimaad xumo darteed ku yeelan waayey abaalgud, isla markaana aan haysan wax nooli ah, waxaa awoodda Taliyaha Xabsiga ah inuu nooliyo si waafaqsan xeer-nidaamiyaha.

## QODOBKA 34-AAD

## DHIMIDDA MUDADA MAXBUUSKA

1. Maxbuuska xariga lagu xukumay haddii dhaqankiisa uu wanaagsanaado waxaa laga dhimayaa muddada xabsigiisu ku xukuman yahay saddex meelood meel 1/3.
2. Iyadoo la raacayo talada taliyaha, Xeer-Ilaalinta iyo codsiga Wasiirka, wuxuu Madaxweynuhu u fidinayaa cafis maxaabiis ama maxbuus cafis ku saleysan shuruudo gaar ah sida xanuun halis ah.
3. Iyadoo looga dan-leeyahay fulinta faqradaha qodobkan, waxaa maxbuuska marka xabsiga lagu qaabilo lagu wargelinayaa muddada xarig dhimista buuxda ee uu dhaqan wanaagiisa ku heli karo dhammaadka xarigiisa, in

lagala noqon karo iyo sababaha keeni kara in lagala noqdo.

4. Iyadoo uu go'aankeeda leeyahay Taliyaha Ciidanku, maxbuusku wuxuu ku waayi karaa xabsi dhimistiisa dembi uu xabsiga ku galay.
5. Ka qaybgelid la'aan barnaamijyada dhaqan celinta, mana yeelanayo xarig dhimis muddada uu ugu jiro cusbitaal khalad isaga ka yimi ama is bukaysiin been ah, ka dib marka dhakhtar caddeeyo ama uu ku jiro gaar u xirid loogu soo rogey ciqaab ahaan.
6. Taliyaha Ciidanku wuxuu awood u leeyahay soo celinta, qayb ahaan ama gebi ahaanba, xarig dhimista laga qaaday maxbuuska, markuu xaqiiqsado in hab-dhaqankii maxbuusku hagaagay.

## QODOBKA 35-AAD
## SII-DEYN SHURUUDO KU XIRAN

1. Maxbuus ku xukuman hal (1) sano ama in ka badan markuu dhammeysto ugu yaraan saddex meelood (1/3) meel wakhtiga xukunkiisa, wuxuu xaq u yeelanayaa xabsi dhimid ugu yaraan saddex meelood oo meel (1/3) marka laga reebo maxbuuska galay dil, argagixiso, budhcad badeed, dhac hubaysan, kufsi ama dembiyada culus ee kale.
2. Maxbuuska xaqa u leh sii deynta shuruudaysan, ka hor intaan loo oggolaan siideynta, waxaa la marinayaa hubin iyo ballan qaad shuruudaysan.

## QODOBKA 36-AAD
## CAFISKA IYO SAAMAXAADDA MAXAABIISTA

Cafiska iyo Saamaxaadda waxaa awood u leh Madaxweynaha Dawladda Puntland sida ku cad Qodobka 80-aad faqradiisa 11-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland, markuu helo soo jeedinta Hay'addaha Shuruucda ee ku shaqada leh.

# CUTUBKA 5-AAD

# KALA-SOOCID MAXAABIIS

## QODOBKA 37-AAD

## KALA-SAARIDDA RAG IYO DUMAR MAXAABIIS AH

1. Rag iyo dumar maxaabiis ah waa in lagu kala hayaa dhismeyaal kala gaar ah ama qeybo kala soocan ee xabsi, iyadoo looga gol-leeyahay in laga hortago intii suurtagal ah is aragooda ama wada hadalkooda iyo ilaalinta anshaxa.
2. Xabsi kasta oo ay ku xiran yihiin dumar maxaabiis ah waa in ay ka hawl gashaa xubin dumar ciidan ah oo daryeel iyo korjoogteyn ku sameysa dumarka maxaabiista ah oona ka mas'uul ah anshaxooda.

## QODOBKA 38-AAD

## KALA SAARIDDA MAXAABIISTA

Maxaabiista waxaa loo kala saarayaa sida soo socota:-

1. Maxaabiista la xukumay waxaa laga dhex saarayaa kuwa Rumaanka ah.
2. Maxaabiista Ragga ah waxaa laga soocayaa kuwa Dumarka ah.
3. Maxaabiista waxaa loo kala saarayaa nooca dembiyadooda, waxaana la siinayaa wixii daryeel iyo Daawo ah oo ay u baahdaan.
4. Maxaabiista maskaxda ka jirran waa in laga sooco kuwa kale.
5. Maxaabiista nidaamka wanaagsan iyo amaanka xabsiga dartii ay tahay in maxaabiista kale looga sooco.
6. Maxaabiista markii koowaad dembi lagu helay laguna soo xirey waa in laga sooco kuwa caadeystayaasha ah.
7. Saraakiisha xabsigu waa inaysan la kulmin maxaabiista aysan isku jinsiga ahayn, haddii uusan goob joog ahayn sarkaal kale oo ay isku jinsi yihiin maxbuuska.

## QODOBKA 39-AAD

### MEEL GAARA KU HAYN

1. Si loo dhawro Maamul wanaagga iyo ammaanka xabsiga, Taliyaha xabsigu wuxuu amar qoraal ku bixin karaa in si gooni ah xabsiga gudihiisa loogu xiro maxbuuska muddo aan ka badneyn hal bil.
2. Taliyaha xabsiga wuxuu la socodsiinayaa taliyaha ciidanka amar kasta uu bixiyo.
3. Maxbuus kasta oo gooni ku xiran wuxuu helayaa hawo ku filan, qorax iyo jimicsi muddo aan hal saac ka yareyn maalin kasta.

## QODOBKA 40-AAD

### ISTICMAALKA HUBKA

1. Taliyaha Xabsiga, sarkaal xabsi ama xubin ciidan oo uu Taliyaha Ciidanku u xilsaaray ilaalinta maxbuuska wuxuu u isticmaali karaa hubka fudud maxbuuska isagoo raacaya tallaabooyinkan:-
   b) Ka hor intaan la isticmaalin hubka si waafaqsan qodobkan, waxaa la qaadayaa (marka ay qaadistooda duruufuhu oggolaanayaan) tallaabooyin lagu amrayo maxbuuska ama qofka kale in uu ka joogsado khaladka uu ku socdo.
   t) Waxaa la adeegsanayaa haddii ay suurtagal tahay koox ciidanka ah ee ka hortaga kacdoonnada maxaabiista.
   j) Waxaa loo isticmaalayaa haddii uu ka joogsan waayo isku deyga inuu ka baxsado haynta sharciga ah, haddii ay ugu muuqato qofka hubka isticmaalaya in isticmaalka hubku uu lagama maarmaan u yahay ka joojinta maxbuuska baxsashada.
   x) Weeraraya ama isku deyaya in uu weeraro qof kale, haddii weerarkaasi uu ugu muuqdo qofka hubka isticmaalaya inuu yahay dabeecad ahaan mid halis gelin kara nafta qofka kale.
2. Taliye xabsi, sarkaal xabsi ama xubin ciidan ee oo uu Taliyaha Ciidanku u xilsaaray ilaalinta maxbuusku, wuxuu ku isticmaali karaa hubka fudud:-
   b) Qof ka soo-furanaya ama isku deyaya in uu ka soo-furto maxbuus haynta

sharciga ah ee Taliyaha Ciidanka.

t) Qof u-dhacaya ama si kale ugu gelaya, isku deyaya in uu u-dhaco ama si kale u galay xabsi isaga oo aan haysan oggolaansho sharci ah.

3. Taliyaha Xabsigu wuxuu amri karaa in hub loo isticmaalo tiro maxaabiis ah, marka ay si abaabulan u samaynayaan ama sameeyeen kacdoon ama dagaal ay kula wareegayaan ama ay kula wareegeen gacan-ku-haynta xabsiga ama qaybo muhiim ah oo ka mid ah, oo ay diidaan in ay u hoggaansamaan nidaamka iyo amarrada Taliyaha Xabsiga.
4. Hubka fudud waxaa loo isticmaali karaa xaaladaha ku xusan faqradaha (1, 2 iyo 3) ee qodobkan, markay Taliyaha Xabsiga ama qofka isticmaalaya hubka ay ugu muuqato oo keliya in isticmaalka hubku uu lagama maarmaan u yahay xaqiijinta ujeeddada laga leeyahay faqradaha (1, 2 iyo 3) ee qodobkan.
5. Haddii maxbuusku ama qofka kale ku hakan waayo tallaabada ku xusan faqradda 6-aad ee qodobkan, lagana baqo in wixii intaas ka dambeeya ay dhacayso dhibaatadii laga hor tagayey, waxaa bannaan in hubka sida ugu suurto-galsan loogu adeegsado meelo aan halis ahayn oo jirkiisa ka mid ah sida in lugaha laga dhaawaco.
6. Looma adeegsan karo hub maxbuuska ilaa qofka hubka isticmaalayaa xaqiiqsado in aan si kale loo baajin karin falka sharci-darrada ah ee maxbuusku ama qofka kale ku kacayo.
7. Xaaladaha lagu sheegay faqradaha (1 iyo 2) ee qodobkan, sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee loo xilsaaray ilaalinta maxbuuska ma adeegsanayo hub haddii uu goobta joogo Taliyaha Xabsigu, haddii aanu Taliyaha Xabsigu amar ku siin sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee loo xilsaaray ilaalinta maxbuuska in uu hubkiisa u adeegsado xaaladda.
8. Marka adeegsiga hubku uu sababo dil ama dhaawac culus, waxaa Taliyaha Xabsigu si aan dib u dhac lahayn u baarayaa sababta keentay dilka ama dhaawaca culus, gun gaarka baaristana wuxuu si dhakhso ah ugu gudbinayaa Taliyaha Ciidanka iyo Xafiiska Xeer-Ilaalinta.
9. Sida ugu macquulsan ee suurto-galka ah, hubka la siiyo saraakiisha xabsiga waa in uu yahay hub uu leeyahay Ciidanku, oo uu isagu maamulo.

10. Sarkaalka xabsi ama xubinta ciidan ee u adeegsada hubka qaabka sharciga ah, lana yimaadda taxadarka loo baahan yahay, loo raacimaayo mas'uuliyad madani ama mid ciqaab ah oo falkiisa ka timaadda.

## QODOBKA 41-AAD

### KU XAD-GUDUBKA AMAANKA XABSIGA

1. Ka hor intaan la adeegsan awood, waxaa la bixinayaa digniin la xiriirta cawaaqib-xumida ka dhalan karta ka baaqashada u hogaansami la'aanta nidaamka xabsiga.
2. Haddii lagu xadgudbo nidaamka ama amaanka xabsiga, taliyaha xabsigu wuxuu amar ku bixin karaa in la adeegsado awood si loo sugo nabadgelyada xabsiga.

## QODOBKA 42-AAD

### DHIMASHADA MAXBUUSKA

1. Marka ay dhimasho ku timaaddo maxbuus, Taliyaha Xabsigu wuxuu si degdeg ah u ogeysiinayaa:-
   b) Dhakhtarka, si uu u caddeeyo sababta dhimashada.
   t) Xafiiska Xeer-Ilaalinta, si uu u baaro in dhimashada maxbuuska ay cidi dembi ku leedahay iyo in kale.
   j) Qoyska marxuumka si uu u xaqiiqsado xaaladda keentay dhimashada marxuumka.
   x) Maxkamadda awoodda u leh, haddii aanay dacwadda marxuumku ahayn mid noqotay kama dambays, si ay maxkamadda dacwadda hortaala ay u ooddo dacwadda dhimashada ku timi maxbuuska awgeed.
   kh) Taliyaha ciidanka asluubta iyo Wasiirka Caddaaladda.
2. Haddii aan Xeer-ilaaliyaha Guud ama ku xigeenkiisu sabab baariseed u joojin aaska maxbuuska dhintay, meydka maxbuuska waxaa lagu wareejinayaa qoyska maxbuuska dhintay.
3. Haddii aanu maxbuuska dhintay ehel lahayn ama aan la heli karin ehelkiisa, waxaa meydka maxbuuska aasaya Ciidanka Asluubta, ka dib markuu helo ruqsadda aasidda ee Xafiiska Xeer-ilaalinta.

## QODOBKA 43-AAD

### AWOODDA BAARISTA IYO SU'AALO-WEYDIINTA DADKA XABSIGA GELAYA

1. Taliyaha Xabsigu wuxuu waajibin karaa ama amri karaa baarista:-
   b. Qof gelaya ama doonaya in uu galo xabsiga.
   t. Qof dibadda ka jooga xabsiga balse u dhaw, oo baaristiisu ay Taliyaha Xabsiga ugu muuqato in ay lagama maarmaan u tahay kala dambaynta iyo ammaanka xabsiga.
   j. Hubinta shay kasta oo uu qofku haysto ama maamulayo oo uu ka mid yahay baabuurku.
   x. Qof loo oggolaaday in uu galo xabsi ama iyadoo loo oggolaaday in uu galo markaas uu ka baxay xabsiga, waxaa Taliyaha Xabsigu amri karaa in baaris lagu sameeyo isaga qof ahaan iyo ilmo kasta oo la socda waxaanu amri kara, haddii ay la noqoto, hubinta shay kasta oo uu qofku haysto ama maamulkiisa ku jira ama uu ilmuhu haysto ama maamulka ilmaha ku jira.

## QODOBKA 44-AAD

### DEMBIYADA KA DHASHA ALAABTA REEBBAN

1. Qof kasta oo soo gaarsiiya, keena ama si kale u soo geliya xabsiga alaab reebban ama isku daya inuu soo gaarsiiyo, keeno ama si kale u soo geliyo xabsiga alaab reebban:-
   b) Isagoo uga dan leh inuu jebiyo kala dambaynta, ammaanka iyo maamul wanaagga xabsiga.
   t) Marka alaabta reebbani tahay mid wax u dhimi karta kala dambaynta, ammaanka iyo maamul wanaagga xabsiga, wuxuu galay dembi, waxaana loo dhiibayaa ama looga warbixinayaa booliiska.
   j) Sarkaal xabsi ama xubin ciidan ee ogaalaada in alaab reebban lala galo xabsiga sida lagu mamnuucay xarfaha b iyo t ee qodobkan wuxuu galayaa dembi, waxaana loo dhiibayaa taliyaha xabsiga.
2. Qofka isagoo aan oggolaansho ka haysan Taliyaha Xabsiga ama Taliyaha Ciidanka, kala baxa, ka qaada ama si uun uga saara xabsiga alaab reebban

oo aanu haysan markii loo oggolaaday in uu galo xabsiga, wuxuu galay dembi waxaana loo dhiibayaa ama looga warbixinayaa booliiska.

## QODOBKA 45-AAD

## REEBBANAANTA AG-JOOGISTA XABSIGA IYO MAXAABIISTA

1. Waxaa reebban in qof aan shaqo la garanayo ka hayn ama muraadka ay u joogaan aan la aqoon, ay ag joogto xabsiga ama goob kale oo ay maxaabiisi ku sugan tahay. Qof kasta oo uu sarkaal booliis ama sarkaal xabsi uu uga digo arrintaas ama uu ka codsado in uu halkaa ka tago, oo u hoggaansami waaya waxaa loo qaadanayaa inuu ujeeddo qalloocan leeyahay.
2. Sarkaal booliis ama sarkaal xabsi, isagoo aan u soo qaadan warqada xiritaanka (warrent) wuxuu xiri karaa qof kastoo uu ku qabto isagoo ku xad-gudbaya ama uu si macquul ah ugu arko inuu ku xadgudbayo faqradda (1) ee qodobkan, waana inuu maxkmadda ku horgeeya 48 saacadood gudahood.
3. Sarkaalka xabsi ee qof xira, isagoo raacaya faqradda (2) ee qodobkan, wuxuu qofkaa ku wareejinayaa sarkaal booliis, si uu qofkaa sharciga u mariyo.

## CUTUBKA 6-AAD

## WAAJIBAADKA IYO SHAQADA MAXAABIISTA

## QODOBKA 46-AAD

## WAAJIBAADKA IYO MAS'UULIYADAHA MAXAABIISTA

1. Maxbuuska waxaa waajib ka saaran yahay:-
   b) Fulinta waajibaadka muwaadinimo ee ku xusan shuruucda u degsan Dawladda Puntland ee ku saabsan anshaxa iyo dhaqanka maxaabiista oo ah in uusan ku xad-gudbin xuquuqda, xoriyadda, karaamada iyo sharafka dadka kale.
   t) U-hogaansanaanta xeerarka maamul ee xabsiga iyo shuruucda kale ee Dawladda Puntland leedahay.
   j) Si ixtiraam leh u la dhaqmo shaqaalaha, dadka soo booqanaya xabsiga iyo maxaabiista kale.
   x) Sidoo kale inuu tago xafiiska laga maamulo xabsiga marka looga yeero,

fulin la'aanta mas'uuliyadaha iyo awaamiirta maamulka xabsiga ee ku xusan xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha kale uu ku shaqeeyo maamulka xabsiga waxaa ka dhalanaya mas'uuliyad sharci.

2. Maxbuuska ku xadgudba Waajibaadka xeerkan dhigayo waxaa la horgeynayaa Maxkamadda awooda u leh.

## QODOBKA 47-AAD

## SHAQO MAXAABIIS

1. Dhammaan Maxaabiista xukuman haddii ay caafimaad ahaan u fiyaw yihiin, waxaa looga baahan yahay inay ka shaqeeyaan gudaha xabsiga, iyadoo la ilaalinayo iyo inay qabtaan shaqo kasta oo uu u xilsaaro Sarkaal xabsi iyadoo la raacayo shuruudahan:-
   b) Dumarka maxaabiista ah waxaa laga shaqaaleysiinayaa nawaaxiga xabsiga oo keliya shaqadaas oo u qalanta xaaladda jinsigooda.
   t) Maxaabiista aan ahayn xukumanayaal waxaa looga baahan yahay inay nadiifiyaan qolalkooda, nawaaxiga qolalkooda, qalabka guryahooda, dharkooda iyo maacuuntooda.
   j) Marka laga reebo maxaabiista ku xukuman dembiyada culus.

## QODOBKA 48-AAD

## WAX-SOO-SAARKA MAXBUUSKA

### IYO ABAALGUDKA SHAQADA

1. Maxaabiista xukuman waxay heli karaan shaqo lacag leh si waafaqsan xeerarka shaqada ee bulshada dhexdeeda iyo Sharciyada shaqada ee Dawladda Puntland.
2. Maxaabiista xukuman ee gudanaya shaqooyinka loo xilsaaro waxay heli karaan haddii hay'ado ay ka jiraan fursado ama adeegyo shaqo oo leh mushahaar si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaasha.

## QODOBKA 49-AAD

### BARNAAMIJYADA DHAQAN-CELINTA

1. Taliyaha Xabsigu, mar kasta oo ay suuragal tahay, wuxuu diyaarinayaa barnaamijyo dhaqan celineed, isagoo la kaashanaya dad aqoon u leh oo ku habboon noocyada kala duwan ee maxaabiista.
2. Barnaamijyada dhaqan celineed waxay ku wajahnaanayaan, sidii maxbuuska looga baabi'in lahaa dhaqanka dembiilenimo, looguna beeri lahaa dhaqan toosan oo uu bulshada dib ugula midoobo marka la sii daayo.
3. Maxbuuska xaaladaha nafsiga ee duruufaha gaarka ah leh ku sugan, waxaa la siinayaa dhaqan-celin iyo daaweyn nafsi ah oo xaaladdiisa ku habboon.

## CUTUB 7-AAD

## XUQUUQDA IYO DARYEELKA MAXAABIISTA

## QODOBKA 50-AAD

### OGEYSIINTA MEESHA LAGU XIRAY

1. Taliska Ciidanka Asluubta Puntland waxaa waajib ku ah labo (2) maalin oo shaqo ah gudahood inay u diraan qoraal lagu ogeysiinayo xaaska maxbuuska, qof kamid ah qaraabadiisa, ama wakiilkiisa sharci in la soo gaarsiiyey iyo goobta loo asteeyey inuu xukumanaha ku qaato muddada xabsigiisa.
2. Waxaa loo diraa ogeysiinta soo gaaridda ajnabi muddo kooban safaaradiisa, qunsuliyadda wadankiisa ama dawlad kale oo matali karta muwaadinkaas, iyadoo loo marayo Wasaarrada Qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga ah.

## QODOBKA 51-AAD

### CUNTADA MAXAABIISTA

1. Maxbuus kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo cunto wanaagsan oo ku filan si waafaqsan halbeegga cuntada ee lagu qeexayo Xeer-nidaamiyeyaal. Maxbuuska waxaa loo oggolaan karaa inuu helo cunto uga timaada ilo gaar ah saacado habboon oo mareysa baaritaan iyo shuruudaha kale ee uu tilmaamayo Taliyaha.

2. Xaalado gaar ah ayaa si habboon loo tixgelinayaa nooca iyo heerka noloshii hore ee maxbuuska iyo gaar ahaan nooca cunto ee uu qabatimay.

## QODOBKA 52-AAD

## DHARKA MAXAABIISTA

1. Maxbuus kasta oo xukumane ah waxaa la siinayaa oo uu xiranayaa dharka xabsiga ama calaamado lagu qeexayo Xeer-nidaamiyeyaal, dhar dheeraad ama beddel ah ayaa la siin karaa si waafaqsan talo-bixinta sarkaal caafimaad ama amar uu bixiyey Taliyaha xabsiga markuu arko sabab muuqata.
2. Haddii maxbuus aan xukumaneyn wadan dhar uu leeyahay ama uu taliyaha xabsiga u arko in dharkaasi ahayn mid habboon, maxbuuskaas waxaa la siinayaa dharka xabsiga.
3. Haddii maxbuuska aan xukumaneyn uusan heli-karin dhar nadiif ah taliyaha xabsiga wuxuu siinayaa dharka xabsiga.

## QODOBKA 53-AAD

## GOGOSHA MAXAABIISTA

1. Maxbuus kasta waxaa la siinayaa Gogol si ku qeexan Xeer-nidaamiyaha.
2. Gogol dheeraad ama bedel ah ayaa la siin karaa si waafaqsan talo bixinta sarkaal caafimaad.
3. Waxaa reebban in si khasab ah hurdada loogu kala gooyo maxaabiista habeenkii, marka laga reebo xaaladaha ay dhacaan baxsasho, rabshado, dab, shilal, masiibo dabiici ah, ama khatar caafimaad oo ku wajahan nolosha maxaabiista.

## QODOBKA 54-AAD

## MABAADI'DA ASAASIGA AH EE LA DHAQANKA MAXAABIISTA

1. Marka la dhaqangelinayo xeerkan, waa in lagu saleeyaa mabaadi'da aasaasiga ah ee ay dhigayaan Xeerarka Dawladda Puntland.
2. Maxbuusku waa qof nugul oo xorriyadii laga qaaday, wuxuuna xaq u leeyahay inta uu xiran yahay xuquuqahan soo socda :-

b) Dhammaan maxaabiista waa in loola dhaqmo si xushmad leh oo u qalanta

sharaftooda iyo karaamadooda bani'aadannimo.

t) Waa inaan lagu takoorin Diin, isir, midab, jinsi, luqad, dhaqanka suubban, aragti siyaasadeed, Dhaqaale, dhalasho ama xaalad kasta oo kale.

j) In loola dhaqmo si ixtiraam, xaq dhawrid iyo si bani'aadannimo leh.

x) Waa in loo hayo oo keliya si sharciga waafaqsan loona siidaayo sida ugu dhakhsaha badan marka uu sii deyn xaq u yeesho.

kh) In lagu wargeliyo xaqa Qareen yeelasahada iyo racfaan qaadashada.

d) In fursad loo siiyo helitaan qareen xuquuqdiisa u difaaca, wax xadidaad ahna aan laga saarin xaqa qareen yeelasho iyo la kulanka qareenkiisa.

r) Marka laga reebo xaddidaadaha ay keenayso xaqiiqada Xabsiga, dhammaan maxaabiista waa in ay helaan xuquuqda aadanaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee lagu qeexay heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda Aadanaha ee ay Soomaaliya Xubinta ka tahay iyo Xuquuqda iyo Xorriyadaha ku xusan Dastuurka Dawladda Puntland.

s) Dhammaan maxaabiistu waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan hawlaha dhaqanka iyo waxbarashada loogu talagalay horumarinta shakhsiyadda aadanaha.

sh) Waa in la dhiirigeliyaa dedaallada lagu yaraynayo xabsi keli /sheelada(ciqaab ahaan ama waa in la xaddidaa isticmaalkiisa).

dh) Waa in la abuuraa xaalado u sahlaysa maxaabiista inay qabtaan shaqo mushahar leh oo macne leh oo ay ka dhex shaqeeyaan xabsiga gudihiisa, taasoo u sahlaysa inay dib uga mid noqdaan suuqa shaqada ee dalka una saamaxaya inay ka qaybqaataan taageeradooda dhaqaale iyo tan qoysaskooda.

c). Maxaabiistu waa inay helaan adeegyada caafimaad ee dalka ka jira, iyadoon la takooreynin xaaladdooda sharci.

g) Caawinaadda ay hay'adaha iyo bulshada rayid ka ah u fidiyaan maxbuuska, iyadoo la tixgelinayo danaha dhibbanayaasha, waa in la abuuraa xaalado dib loogu soo celinayo maxbuuska bulshada markuu dhammaysto muddo xabsiyeedkiisa, iyadoo la raacayo qaababka ugu wanaagsan.

3. Mabaadi'da aasaasiga ah ee kor ku xusan waa in lagu dabaqo si siman dhammaan dadka la xukumay ee ku jira xabsiyada ku meel gaarka ah, xabsiyada iyo xarumaha dhaqancelinta iyagoo aan la kala takooreynin.

## QODOBKA 55-AAD

## RUGTA CAAFIMAAD EE XABSIGA

1. Sida ugu suurtagalka ah ee xabsi kasta, waa inuu lahaadaa rug caafimaad ama goob ku habboon oo leh daryeel caafimaad ee maxaabiista bugta lagu hayo.
2. Xabsiga weyn ee loogu talo galay maxaabiis ka badan 300, waxaa laga hirgelinayaa qol ama ka badan oo xarun ahaan loogu adeegsado maxaabiista bukta ee aan xaaladdooda caafimaad gaarsiisnayn in loo wareejiyo cusbitaal iyo shay-baadh caafimaad.
3. Cusbitaallada heer gobol waxaa laga hirgelinayaa xarun u gaar ah maxaabiista bukaanka ah oo ku habboon ilaalintooda, si kala gooni ahna loogu hayn karo maxaabiista haweenka ah iyo kuwa ragga ah.
4. Maxbuuska waxaa loo dammaanad qaadayaa xaqa booqasho, iyadoo la raacayo habraaca xeerkan ku xusan, marka lagu daweynayo xarumaha daryeelka caafimaadka wuxuu xaq u leeyahay in lala xiriirsiiyo ehelkiisa si waafaqsan xeerkan.
5. Maxbuusku waa inuu helo daryeel caafimaad ee ay dammaanad qaadeen sharciyada, barnaamijyada iyo istaraatiijiyaadka Caafimaadka ee Dawladda Puntland, marka laga reebo xaddidaadda xeerkan lagu qeexay.
6. Daryeelka waxaa lagu dammaanad qaadayaa habraacyada caafimaadka, tallaabooyinka ka hor tagga oo ah qaab daryeel caafimaad oo lacag la’aan ah.
7. Maxbuus kasta oo ku jira Xabsiyada Puntland waxaa daryeelkiisa caafimaad ka mas’uul ah Saraakiisha ciidanka asluubta ee xabsiga.

## QODOBKA 56-AAD

## SARKAAL CAAFIMAAD

Sida ugu suurta-galsan, xabsi kasta waa inuu lahaadaa sarkaal caafimaad oo ka mas’uul noqonaya caafimaadka, daryeelka iyo daawada ee dhammaan

maxaabiista, haddii kale, sarkaalka caafimaad ee ugu dhaw deegaanka xabsigaas ayaa samaynaya daryeel booqashooyin joogto ah kana mas'uul noqonaya caafimaadka iyo daawada dhammaan maxaabiista.

## QODOBKA 57-AAD

## DHAKHTAR IYO KALKAALIYEYAAL CAAFIMAAD

1. Sida ugu suurto-galsan, waxaa xabsiyada laga hawlgelinayaa dhakhtar iyo kalkaaliyeyaal u xilsaaran caafimaadka maxaabiista oo lagu eego bukaanka maxaabiista.
2. Marka ay suurto-geli weydo in xabsi laga hawl-geliyo dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad waxaa caafimaadka maxaabiista loo xilsaarayaa dhakhtarka iyo kalkaaliyeyaasha caafimaad ee ugu dhaw xabsiga, kuwaasoo si joogto ah uga warhaynaya caafimaadka maxaabiista.
3. Marka xaaladda caafimaad ee maxbuusku u baahan tahay dhakhtar takhasus gaar ah leh, ama uu maxbuusku leeyahay dhakhtar gaar ah, Taliyaha Xabsigu kadib markuu qiimeeyo xaaladda maxbuuska wuxuu oggolaanayaa in dhakhtarka gaarka ahi uu maxbuuska ku daaweeyo xabsiga ama goobta kale ee lagama maarmaanka ah.

## QODOBKA 58-AAD

## NADAAFADDA XABSIGA

1. Taliyaha Xabsigu wuxuu xil iska saarayaa daryeelka iyo kor u qaadista nadaafadda iyo fayo dhawrka xabsiga, isagoo ku samaynaya kormeer joogto ah.
2. Heerka nadaafadda iyo faya dhawrka guud ahaan looga baahan yahay xabsiyada waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

## QODOBKA 59-AAD

## U-WAREEJINTA CUSBITAALKA MAXAABIISTA BUKTA

1. Haddii ay khatari ku timaaddo caafimaadka maxbuus ku jira xabsi, Taliyaha Xabsigu wuxuu u wareejin karaa cusbitaalka dawladda markuu arko talada dhakhtarka ku shaqada leh marka ay xaaladdu degdeg tahay, Taliyaha

Xabsigu wuxuu amri karaa in maxbuuska la dhigo cusbitaalka isagoo aan helin talada dhakhtarka.

2. Maxbuuska lagu wareejiyey cusbitaalka dawladda, sida ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan, wuxuu ku jiraa ilaalinta sharciga ah ee Taliyaha Xabsiga.
3. Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo lagaga hortagayo in uu baxsado maxbuusku muddada uu ku jiro cusbitaalka.
4. Marka dembiga loo xiray maxbuusku uu culus yahay ama Taliyaha Xabsigu uu arko in maxbuuska si adag loogu ilaaliyo Cusbitaalka, waxaa ilaalinta maxbuuska loo xilsaarayaa xubno Ciidanka Asluubta ah oo aan ka yarayn saddex (3) xubnood oo ilaalintiisa iska nasiya, iyagoo aan u kala tegeyn, waxa ayna leeyihiin awood kasta oo lagaga hor tegayo in maxbuusku baxsado ka hor intaan lagu celin xabsiga.
5. Marka maxbuuska xaaladdiisa caafimaad hagaagto ee dhakhtarka daaweyntiisa ka mas'uulka ahi uu qoraal ahaan ku caddeeyo in maxbuuska laga saari karo cusbitaalka, Taliyaha Xabsigu wuxuu maxbuuska dib ugu celinayaa xabsiga, haddii uu weli xarig u haray maxbuuska.
6. Haddii uu dhakhtarku lagama maarmaan u arko wuxuu maxbuuska u qorayaa daawo uu ku qaato xabsiga.

## QODOBKA 60-AAD

## WAREEJINTA MAXBUUSKA QABA CUDURADA FAAFA

1. Marka lagu arko maxbuus xiran cudurrada faafa ee uu dhakhtarku sidaas caddeeyo, Taliyahu marka uu ka helo oggolaansho Xeer Ilaaliyaha Guud iyo maxkamadda awoodda u leh wuxuu u diri karaa maxbuuska xarunta ama cusbitaalka u gaarka ah cudurradaas haddii ay jiraan oo lagu haynayo inta uu bogsanayo ama xariggu u dhamaanayo, isagoo raacaya talada dhakhtarka.
2. Maxbuusku markuu cusbitaalka muddo ku jiraba, madaxa cusbitaalka ama xarunta cudurrada gaarka ahi wuxuu warbixin ka siinayaa Taliyaha

Ciidanka, isagoo qoraaya caddayn tilmaamaysa in maxbuusku u baahan yahay in lagu sii hayo cusbitaalka ama xarunta.

3. Marka madaxa cusbitaalka ama xarunta caafimaad ee cudurradda gaarka ahi uu arko inaan loo baahnayn in maxbuuska lagu sii hayo, wuxuu u gudbinayaa Taliyaha Ciidanka qoraal caddaynaya in maxbuuska ay ka dhammaatay hayntii lagu hayey cusbitaalka ama xarunta, markaas oo Taliyaha Ciidanku dib ugu celinayo maxbuuska xabsiga, haddii aanu ka dhammaan xarigu.
4. Haddii maxbuuska qaba cudur ka mid ah cudurrada ku xusan faqradda 1-aad ee qodobkani uu yahay maxbuus loo soo xiray dembi culus, Taliyaha Ciidanku wuxuu kala xiriirayaa madaxa cusbitaalka ama xarunta cudurrada gaarka ah sidii looga feejignaan lahaa in maxbuusku baxsado muddada daaweyntu u socoto, wuxuuna u xilsaarayaa xubno ciidan oo ku filan ilaalintiisa.

## QODOBKA 61-AAD

## OGEYSIINTA MAXKAMADDA

## WAREEJINTA MAXBUUS GARSUGE AH

Haddii maxbuuska cusbitaal ama xarun caafimaad loo wareejiyey yahay maxbuus garsuge ah ama ay dacwadiisu bilaw tahay ama aanu weli xukunkiisu noqon kama-dambays, Taliyaha Xabsigu wuxuu si aan dib-u-dhac lahayn u ogeysiinayaa maxkamadda khusaysa u-wareejinta maxbuuska cusbitaalka ama xarunta caafimaad ee ku xusan Qodobbada (59) iyo (60) ee Xeerkan.

## QODOBKA 62-AAD

## XUQUUQDA HAWEENKA UURKA LEH

1. Haweenka xabsiyada ku jira ee uurka leh ama nuujinaya waa in la siiyo daryeel caafimaad oo joogto ah iyo cunto ku habboon xaaladdooda caafimaad, iyadoo uu kormeerayo dhakhtar aqoon u leh arrimaha haweenka iyo dhalmada.

2. Foosha, dhalmada iyo daryeelka ka dambeeya waa in lagu qabtaa xarun caafimaad oo rasmi ah, waxaana si buuxda looga mamnuucayaa in haweenayda lagu xiro silsilado iyo sheelada xilligaas.
3. Ilmaha yar waxaa la oggol yahay inuu la joogo hooyadiis xabsiga, iyadoo mudnaanta la siinayo danta iyo daryeelka ilmaha.
4. Haweenka dhawaan umulay balse aan ilmahooda la joogin waa in la siiyo taageero caafimaad iyo nafsiyeed oo ka caawisa soo kabashada iyo wanaagga maskaxeed.
5. Hooyadda iyo dhallaankeeda ku jira xabsiyada looma tixgelin karo sidii maxaabiista kale waana in meel gaar ah lagu hayaa, lana siiyo daryeel, hoy iyo xuquuq gaar ah oo waafaqsan xaaladdooda khaaska ah ee hooyonimo iyo caafimaad.

## QODOBKA 63-AAD

## CODSIYADA IYO CABASHADA MAXBUUSKA

1. Maxbuus kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu codsi ama cabasho u dirto hay'adaha ay khusayso waana in socodsiinta xaqaas loo marsiiyaa Taliyaha Xabsiga.
2. Maxbuus wuxuu sameyn karaa cabashooyin uu ka qabo hay'adaha ay khusayso sida lagu qeexi karo Xeer-nidaamiyaha xeerkan.
3. Si waafaqsan xeerkan, maxaabiistu waxay xaq u leeyihiin inay soo jeedinno, caddeymo iyo cabashooyin ay u gudbiyaan Taliska Ciidanka Asluubta ee Dawladda Puntland, Golaha Wakiillada, Difaacaha Xuquuqul Insaanka, Maxkamadaha, Xeer-ilaaliyeyaasha, hay'adaha kale ee dawladda iyo hay'adaha caalamiga ah ee Puntland ka diiwaan-gashan.
4. Farriimaha Cabashooyinka waxaa loo gudbinayaa Ciidanka Asluubta, waraaq caddeynaysa in maamulku helay cabashadaa waana in la siiyaa Maxbuuska, muddo ku eg saddex (3) beri gudahood ama sida kiisaska sharcigu dhigayo, hal maalin gudaheed laga soo bilaabo marka cabashada la qabtay, waa in loo gudbiyaa cabashada ama farriinta qofkii ay ku socotay.
5. Farriimaha iyo tilmaamaha lagu xallinayo cabashooyinka maxaabiista waxaa lagu bixinayaa afka hooyo ama afka uu maxbuusku si fudud u adeegsado.

Jawaabaha cabashooyinkooda waa in lagu siiyaa luqaddii ay markii hore ku soo gudbiyeen, haddii aysan suuragal ahaynna waa in af Soomaali lagu siiyaa, kaddibna loo tarjumaa luqaddii ay ku soo qoreen cabashada.

## CUTUBKA 8-AAD

## WAXBARASHO IYO XIRIIRO BULSHO EE MAXAABIISTA

### QODOBKA 64-AAD

### WAXBARASHADA MAXAABIISTA

1. Taliyahu wuxuu qaadayaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si loo qorsheeyo fasallo waxbarasho oo loogu talo-galay 24 maxaabiis ah iyo inuu oggolaado wakhtigooda nasashada inay bartaan kuna tababbartaan farshaxannada.
2. Muhiimad gaar ah ayaa la siinayaa waxbarashada ganacsi ee maxaabiista ay suurtagalka tahay inay ku adkaato helitaanka nolol-maalmeedkooda marka la sii-daayo.
3. Wasiirka Caddaaladda isagoo la tashanayo taliyaha ciidanka asluubta wuxuu magacaabi karaa culimo wacyi-gelin diineed siiya maxaabiista iyo qabasho adeegyo diineed, waxay heli karaan mushahar ama abaalmarino ku aaddan hawlaha loo xilsaaray, waxaana lagu faah-faahinayaa Xeer-nidaamiyaha xeerkan.
4. Taliyaha xabsigu wuxuu qorsheynayaa goobta ku habboon casharo, bandhigyo, iwm oo loo gudbiyo maxaabiista xilliyada ku habboon.
5. Meel kasta oo suurta-gal ah waxaa la dhigayaa agab loogu tallo-galay tababbarid jireed, ciyaaro iyo laylin, gaar ahaan maxaabiista dhallinyarada ah iyo maxaabiista muddo dheer ku xukuman.
6. Meel kasta oo suurta-gal ah, waa inuu jiraa maktabad uu leeyahay xabsi kasta iyo in maxaabiis loo oggolaado inay ka qaataan buugaag maktabada, iyadoo la raacayo tilmaamaha uu bixinayo Taliyaha si wakhtiyeysan.

## QODOBKA 65-AAD

## XIRIIRKA QOYS EE MAXAABIISTA

1. Mudnaan gaar ah ayuu siinayaa Taliyaha xabsigu dhawritaanka xiriirada ka dhaxeeya maxbuus iyo qoyskiisa, wuxuuna tixgelinayaa in xiriirku ahaado sida ugu fiican ee danaha maxbuuska iyo qoyskiisa.
2. Maxbuus kasta waa in lagu dhiirri-geliyaa oo lagu kaalmeeyaa, sida ugu habboon oo ugu wanaagsan, in la dhawro oo la dhiso xiriiradaas oo ay weheliyaan shakhsiyaad ama hay'ado ka baxsan xabsiga sida kor-u-qaadid kasta oo ay ku jirto danaha ugu wanaagsan ee qoyskiisa ama dhaqancelintiisa gaar ahaaneed.

## QODOBKA 66-AAD

## HELITAAN ADEEG SHARCI

1. Maxbuus kasta wuxuu xaq u leeyahay talo sharci oo ku aaddan arrin kasta oo kaga xiran qareenkiisa markuu doono xilli maan-gal ah haddii kale, waxaa u oggolaanaya Taliyaha xabsiga.
2. Booqashada sharciga waxaa lagu salaynayaa aragtida qareenka, lamana dhegaysan karo maxbuuska iyo qareenkiisa si loo ilaaliyo sir ahaanshaha sharci ee ka dhaxeeya.

## QODOBKA 67-AAD

## BOOQASHADA MAXAABIISTA

1. Maxbuuska xukumani waxaa loo oggolaanayaa booqashada asxaabtiisa iyo dadka uu xiriirka la leeyahay si waafaqsan xeerkan.
2. Maxbuuska wuxuu xaq u leeyahay inuu booqdo qareenkiisa saacada caadiga ah ee shaqada, iyadoo la ilaalinayo maxbuuska lana dhageysaneyn hadalkooda, si loo ilaaliyo sir ahaanshaha sharci ee ka dhexeeya.
3. Taliyaha xabsiga wuxuu tixgelin gaar ah siinayaa booqashooyinka ehelada iyo saaxiibada maxbuuska.
4. Maxbuuska waxaa soo Booqan-kara:-
   b) Xubnaha qoyska iyo saaxiibadiisa.
   t) Dhakhtarkiisa.

j) Qareenkiisa.

x) Wakiillada qunsuliyada haddii maxbuusku yahay ajnabi.

d) Wakiil heer caalami ah oo oggolaansho ka haysta Wasiirka iyo Taliyaha.

## QODOBKA 68-AAD

## BOOQASHADA BOOLIISKA

Sarkaalka Booliiska ahi saacadaha shaqada, ka dib markay oggolaato maxkamadda awoodda u leh, wuxuu geli karaa xabsiga, wuxuunu meel u muuqata sarkaal xabsi, balse aanu ka maqleyn wada-hadalkooda, kula yeelan karaa maxbuuska loo oggolaaday waraysi rasmi ah oo leh ujeeddo baaritaan.

## QODOBKA 69-AAD

## BEDDELKA MAXAABIISTA

1. Maxbuuska garsugaha ah looma beddeli karo xabsi ka fog maxkamadda dacwaddiisa awoodda u leh, haddii aanay maxkamad awood u lihi amrin in xabsi kale loo wareejiyo.
2. Maxbuuska xukuman ee racfaan qaatay ama laga qaatay waxaa lagu haynayaa ama loo beddelayaa xabsiga ugu dhow maxkamadda dacwaddiisu hortaalo.
3. Xaalad kasta oo maxbuuska laga beddelayo xabsiga uu ku xiran yahay, waxaa beddelkiisa la ogeysiinayaa qoyskiisa, ehelkiisa, qareenkiisa ama ciddii kale ee uu doorto ka hor beddelkiisa.
4. Marka ogeysiinta lagu sheegay faqradda 3-aad ee Qodobkan, aan loo samayn karin sabab ammaan, xaalad caafimaad ama fulinta beddelka oo degdeg ahaa, waxaa la samaynayaa isla marka maxbuuska la geeyo xabsiga loo beddelayo.

## QODOBKA 70-AAD

## XIRIIR MAXBUUS SHISHEEYE

1. Dadka ajnabiga ah ee la xukumay waxay xaq u leeyihiin inay la xiriiraan safaaradaha iyo xafiisyada qunsuliyadaha dalalkooda.

2. Dadka aan dal lahayn iyo muwaadiniinta dalalkoodu ku lahayn xafiisyo diblomaasiyadeed Dawladda Puntland, waxaa lala xiriirsiinayaa ergada diblomaasiyadeed ee mas'uulka ka ah ilaalintooda ama hay'adaha caalamiga ah ee ilaaliya danaha dadka dal-laaweyaasha ah.

## CUTUBKA 9-AAD

## MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN

### QODOBKA 71-AAD

### MAXBUUSKA DILKA KU XUKUMAN

1. Maxbuuska dilka lagu xukumay waxaa lala xirayaa maxaabiista ku xukuman dambiyada culus, waxaana si joogta ah loogu haynayaa ilaalo gaar ah.
2. Maxbuuska dilka ku xukuman waxaa loo fududaynayaa inuu waraaqaha u diro ama uu la xariiro qoyskiisa, eheladiisa, qaraabadiisa, saxiibbadii iyo qareenkiisa.
3. Waxaa reebban in maxbuuska dilka ku xukuman loo diro wax shaqo ah.

### QODOBKA 72-AAD

### HABRAACA BOOQASHADA MAXBUUSKA DILKA KU XUKUMAN IYO DHAWRIDDA XUQUUQDIISA

1. Marka la booqanayo maxbuus dil ku xukuman, waxaa kor kala soconaya ugu yaraan laba sarkaal oo midkood yahay Taliyaha Xabsiga ama Taliye-xigeenka xabsiga iyo Madaxa Xafiiska Tirada iyo Soo-dhaweynta oo hubinaya in maxbuuska iyo qofka soo booqday aanay si toos ah isugu gudbin wax alaab ah noocay doontaba ha noqotee.
2. Maxbuuska dilka ku xukuman waxaa xabsi-ku-hayntiisa la siinayaa fiiro gaar ah, isla markaana waxaa loo xaqiijinayaa helidda xuquuqdiisa qofnimo ee aan lagaga qaadin xukunka iyo xuquuqda qofka xorriyadda laga qaaday.
3. Maxbuuska dilka ku xukuman waxaa loo oggolaanayaa in uu la kulmo culimada diinta.

# CUTUBKA 10-AAD

# ANSHAX-MARINTA IYO CIQAABTA

## QODOBKA 73-AAD

## HABRAACA ANSHAX-MARINTA MAXAABIISTA

1. Marka la soo saarayo tallaabooyin anshax-marin ee dembiyada ka dhaca xabsiga, taliyaha xabsigu wuxuu amrayaa sarkaalka u xilsaaran inuu galiyo buugga diiwaanka anshaxa qoraalka dembiga lagu soo saaray tallaabo anshaxmarineed, taariikhda dembiga la galay, magaca dembiilaha, nooca anshaxmarinta, saxiixa iyo taariikhda la diiwaan-geliyey.
2. Taliyaha xabsigu wuxuu amrayaa sarkaalka inuu ku diiwaan geliyo dembiyada uu galo maxbuusku buuga ciqaabta si bille ah.

## QODOBKA 74-AAD

## TALLAABOOYINKA ANSHAX-MARINTA

1. Taliyaha xabsigu wuxuu dhegeysanayaa isla-markaasna ka garnaqayaa gefefka anshax ee maxbuuska iyo ciqaabta uu muteysanayo.
2. Maxbuuska waxaa lagu anshax-marinayaa gef kasta oo anshaxa ah si waafaqsan xeerka.
3. Maxabuuska waa in lagu wargeliyaa gefka anshaxa ee lagu eedeeyey, waxaana la siinayaa fursad ku filan uu ku soo xaadiro iskuna difaaco, iyadoo ay ku jirto inuu racfaan u qaato Taliyaha Ciidanka Asluubta.
4. Ma jirto maxbuus lagu anshax-marinayo hal gef in ka badan hal mar.
5. Taliyaha xabsiga wuxuu amrayaa sarkaalka u xilsaran inuu diiwaan-geliyo habraaca anshax-marinta ee xabsiga.
6. Waxaa mamnuuc ah dhammaan tallaabooyinka anshax-marinta arxan darrada ah, bini'aadanimada ka baxsan, kuwaas oo ay kamid yihiin silsilad ku xirid, garaacid, qol mugdi ah gelin ama ciqaab kasta oo wax u dhimi karta caafimaadka jireed ama maskaxeed ee maxbuuska.
7. Waa inaan loo isticmaalin tallaabooyin anshax-marin dhimista cuntada ama daawooyinka iyo diidmada xiriirka xubnaha qoyska iyo asxaabta.
8. Taliyaha Xabsiga ayaa xaddidaya in la jabiyey anshaxa xabsiga iyo ciqaabta.

## QODOBKA 75-AAD

## HABRAACA RAFCAANKA ANSHAXMARINTA EE XABSIGA DHEXDIISA

1. Haddii maxbuuska uu doonayo inuu racfaan ka qaato natiijada anshaxmarinta, wuxuu u geynayaa dacwadiisa Taliyaha Ciidanka Asluubta.
2. Go'aanka Taliyaha Ciidanka Asluubta waa kama-dambeys, iyadoo la tixgelinayo rafcaanka, lama qaadi karo tallaabo anshax-marin ah oo lid ku ah maxbuuska.

## QODOBKA 76-AAD

## ANSHAX-MARINTA UU SOO SAARO TALIYAHA XABSIGA

1. Haddii taliyaha xabsigu xaddido ciqaabta xad-gudubyada xabsi ee ka dhaca Xabsiga uuna oggolaado maxbuusku xad-gudubka lagu soo eedeeyey ama uu ku caddeeyo taliyaha xabsigu, wuxuu ku soo rogayaa hal ciqaab ama ka badan oo ka mid ah ciqaabaha soo socda:-

   b) Digniin, Canaan iyo ganaax.

   t) Ku xanibid qolka jiifka ee xabsiga muddo aan ka badneyn 7 (toddoba) Maalin.

   j) Ku xirid xabsi gooni ah ee qolka ciqaabta muddo aan ka badneyn 7 (toddoba) maalmood.

## QODOBKA 77-AAD

## XAD-GUDUBYO CULUS EE XABSI

1. Maxbuus kasta oo ku kaca mid kamid ah falalka soo socda waxaa lagu qaadayaa xadgudub xabsi ee culus:-

   b) Qalalaase iyo Kicin.

   t) Kas u burburin hanti xabsi.

   j) Weerar culus ama soo noqnoqday ee maxbuus kale.

   x) Ku noqosho xad-gudub xabsi ee fudud, kaddib markii lagu ciqaabay labo jeer isla xad-gudubkaas fudud.

   kh) Fal kasta oo asluub-xumo baahsan ama gadood.

## QODOBKA 78-AAD

## CIQAAB XAD-GUDUBYO XABSI EE FUDUD

1. Taliyaha xabsigu wuxuu samayn karaa baaris sugan kaddib, inuu ciqaabo maxbuus lagu helay dembi ku aaddan xad-gudub xabsi ee fudud, isagoo amraya in lagu qaado mid ama ka badan ciqaabaha soo socda:-

b) Ku-hayn qol gooni ah muddo aan ka badnayn 2 maalmood.

t) Ka-qaadid xabsi-dhimid muddo aan ka badnayn 7 maalmood.

j) Ka-qaadid mudnaanshiyo.

## QODOBKA 79-AAD

## CIQAAB XAD-GUDUBYO XABSI EE CULUS

1. Taliyaha Xabsiga ama sarkaal uu idmay wuxuu samayn karaa baaris sugan kaddib, inuu ku ciqaabo maxbuus lagu helay dembi ku aaddan xad-gudub xabsi oo culus isagoo amraya in lagu qaado mid ama ka badan ciqaabaha soo socda:-

b) Ku-hayn qol gooni ah muddo aan ka badnayn 12 maalmood iyo lumid xabsi-dhimid ee muddadaas.

t) Ka-qaadid xabsi-dhimid muddo aan ka badnayn 14 maalmood.

j) Ka-qaadid mudnaanshiyo.

## QODOBKA 80-AAD

## DABBAQAADDA DEMBIYADA KU XUSAN XEERKAN

1. Markuu dhaqan galo Xeerkani, maxaabiista iyo dadka kale ee xabsiga ku gala dembiyada lagu sheegay xeerkan, waxaa ciqaabtooda loo raacayaa si waafaqsan isla Xeerkan, waxaana dhegeysiga dacwadaha la xiriira dembiyadaas gelaya maxkamadaha awoodda sharci u leh si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta.
2. Wixii fal-dembi ah ee aan xeerkan lagu sheegin waxaa loo raacayaa xeerarka kale ee ciqaabta.

## QODOBKA 81-AAD

## DAMMAANAD-QAADKA SHARCI

## EE CIIDANKA ASLUUBTA

Adeegsiga awoodda ee sarkaal xabsi ama sarkaal kale keeni mayso in lagu oogo dacwad ciqaab ah ama madani ah markuu gudanayo waajibaadkiisa sharciga ah, waana inaysan adeegsan awood ka baxsan xeerka iyo xeernidaamiyihiisa markay gudanayaan waajibaadkooda shaqo.

## CUTUBKA 11-AAD

## QODOBO QUBANE AH

## QODOBKA 82-AAD

## MAXAABIISTA XABSIYADA SHISHEEYE

## LAGA SOO WAREEJIYO

1. Maxaabiista xukuman ee xabsi shisheeye laga soo wareejiyo, laga bilaabo taariikhda ay xabsiyada Puntland soo galaan waxay hoos imanayaan Xeerkan, waxaanay xuquuqaha iyo waajibaadyada kala siman yihiin maxaabiista kale.
2. Soo wareejinta maxaabiista ee xabsiyada shisheeye waxaa loo raacayaa Xeerka Wareejinta Maxaabiista.

## QODOBKA 83-AAD

## RAADINTA MAXBUUSKA BAXSADAY

Taliyuhu wuxuu dadweynaha u soo bandhigi karaa xogta iyo sawirka maxbuuska fakaday si ay uga digtoonaadaan khatartiisa loona soo qabto.

## QODOBKA 84-AAD

## HAGEYAASHA, HAB-RAACYADA IYO

## TILMAAMAHA XILLI-LAHA AH

Isagoo raacaya Xeerkan iyo xeer-nidaamiyaha, Taliyaha Ciidanku wuxuu soo saari karaa hageyaal, tilmaamo iyo habraacyo shaqo oo xilli-le ah oo la xiriira xabsiyada iyo maxaabiista.

## QODOBKA 85AAD

## XEER-NIDAAMIYE

1. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Xeer-nidaamiyaal si habsami ah loogu hirgeliyo xeerkan.
2. Xeer-nidaamiyaha waxaa loo sammeynayaa si waafaqsan qodobadda xeerkan.

## QODOBKA 86-AAD

## BURIN

Xeerkan wuxuu burinayaa Xeer kastoo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin.

## QODOBKA 87-AAD

## DHAQAN-GALKA XEERKA

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo Golaha Wakiilladu, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.